Tusmada Buugga

Mahadnaq 5

Hordhac 5

Baraarujinta Uu Nabigu Inugu Baraarujiyey Guurka 13

Dumar la guursado waxa u fiican midda diinta leh:..... 14

Doobnimadu waa shar iyo balaayo 20

CASHARO XASAASI AH (Galmada Iyo Waxyaalaha Ka Horeeya) 21

Habeenka Aqalgalka: 21

Ducada Marka Ugu Horaysa Ee Ay Isu Soo Galaan: 24

salaadda ay isku xidhanayaan lammaanuhu.....25

Ciyaraha Ka Horeeya Galmada:..... 25

Waxyaalaha Ka Horeeya Galmada: 28

Isqurxinta: 29

Maryo dhigashada 30

Ciyaaraha Lamaanaha 30

Hadaba ciyaartan lamanuhu ay wada ciyarayaan maxay tahay?..... 34

Muhimadda Ay Leedahay Ku Ciyaaridda Xubinka Taranku: . 39

Muhimadda Uu Leeyahay Ku Ciyaaridda Xubinka dumarka ee aadka u Dareenka Badan 40

Fiiro gaar ah: 41

Jacaylka ay dumarku jecel yihiin qaniinyooyinka yar yar 41

Maxaa xal u ah ninka markiiba soo tuuraya biyaha isla markaana xaaskiisu ay tahay mid ay biyehedu raagayaaan: 42

Galmada: 45

Waajibnimada Galmada: 46

Khatarta ka imankarta hadii xaaska loo galmoon waayo: 50

Muhiimada ay leedahay Nadaafadu Marka lagudagelayo Galmada 51

Xishoodkii badnaa ee Nebigu SCW umuu diidayn inuu kahadlo arimaha galmada ama laga hadlo 53

Waxtarka Galmada: 54

Qaar Kamid Ah Qaababka Layskugu Tagi karo 55

Xaaraan Noqoshada In Gabadha Xagga Danbe Looga Galmoodo: 60

Xaaraan Noqoshada In Gabadhii oo Dhiigii Leh Loo Tago: ... 62

Xaaraan Noqoshada In Cid Kale Looga Sheekeeyo Galmada Iyo Hadalada Dhex Mara Lamaanaha 63

Haweenayda Oo Ku Ciyaarta Xubinka Taranka Ee Ninkeeda,68

Muhimada Ay Leedahay Isduugida Lamaanuhu: 71

Qaabka Aad U Duugayso 74

Gabadha oo lasuneeyaa waa arin diintu ogashahay gabadhana u dan ah xaga galmada iyo xagwalba. ..... 75 Talo usocota waalidiinta hablaha dhalay siiba hooyooyinka 79 Canaan adag oo usocota ragga hela gabadh suniyad ah hadana howshaa kufura. ..... 80 Dhaqankii hore ee Somalida xagga galmada 81

FAAH-FAAHINTA MAS'ALADA AH IN LAMAANUHU XUBNAHOODA TARANKA AFKA GALINKARAAN IYO KHILAFKA CULIMADU AY ISKU KHILAAFEEN MAS ALADAN 83

ARAGTIDA QORAAGA 87

GABA-GABADA MAS'ALADAN 89

ARAGTIDA QORAAGA EE KU WAAJAHAN IN SU'AALAHA JINSIGA AH LA WAYDIIN KARO CULIMADA 90

Ra'yiga odhanaya xayawaanaadkuba way yaqaannaan sida la iskugu tago waa sax laakiin 92

Aadaabta ku saabsan habeenka aqal-galka lammaanaha 93

su:aalo iyo jawaabo ku saabsan jimaaca(galmada) 97

Mahadnaq

Ilaahay baa mahad dhamaanteed iska leh, oo ii fududeyey inaan buuggan dhamaystiro. Waxaan sidoo kale mahad u celinayaa dhamaan ciddii igala qaybqaadatay qorista iyo soo saarista buuggan, Waxaan mahad gaar ah u naqayaa Wacays Maxamed Axmed, iyo Cabdijibaar Aadan Cabdi, Sekeriye Maxamud Aadan, oo qorista iyo tafatirista buuggan iga kaalmeeyey.

Hordhac

Bisinka Ilaahay ayaan ku bilaabanayaa Allaha naxariis guud iyo mid gaar ahba naxariista, naxariis

iyo nabadgalyona Rasuulka korkiisa ha ahaato iyo asxaabtii iyo eheladiisa.

GUURKU: waa shay aad u qaali ah shareecada Islaamkuna ay aad u baraarujisay, aayadaha Quraanka, axaadiiska, aathaarka iyo hadalada culimadu intuba waxa ay sheegayaan fadliga guurka.

Allaaah subxaanahu, waxa uu kitaabkiisa ku xusay in la guursado waxaana uu yidhi isaga oo la hadlaya ragga sidatan: (Guursada wixii idiin wanaagsanaada oo dumar ah laba laba, saddex sadex iyo waliba afar afar ba.) aayad kale Rabbi Waxa uu ku xusay sidatan: (Uguuriya kuwa aan xaasaska lahayn).

Aaxaadiithta rasuulka ee baabkani way badan yihiin laakiin mid ama labo hadaynu ka milicsano waa sidatan (Rasuulku wuxu yidhi: kulanka dhalin yartaay midkii karaa in uu guursado ha guursado, waayo wuxuu u dhowrid badan yahay araga, una xafid badan yahay xubinka taranka).

Xadiithkalena waxa uu yahay macnihiisu sidatan hoos ku sheegan: (guursada gabadha dhalmada badan ee la jecel yahay waayo waan idiin ku faanaya umadaha maalinta qiyaame) Waxaa jiray iyana saddex ka mid ah asxaabtii rasuulka iyaga oo yimi mid ka mid ah guryihii rasuulka scw u jeedadooduna waxay ahayd inay ogaadaan cibaadada rasuulka scw markii dabadeed looga sheekeeyay ayay yaraysteen oo xaqireen cibaadadoodii, kadibna way is dhaarsadeen, mid ka mida ayaa yiri anigu waligay waan soomanaanayaa oo maalina afuri maayo, kii labaadna wuxuu yidhi ana waligay habeen seexan maayoo salaad uun baan tukanayaa, halka kii sadexaadna yidhi ana waligay guursan maayo, markii ay tageen ayaa Rasuulkii looga sheekeeyay warkoodii, kadibna wuu u yeedhay waxaana uu yidhi: (ma nimankii sidaa iyo sidaa …. yidhi ayaad tihiin, wallaahi anaa idiinku cabsi badan hadana

wakhtina waan soomaa, wakhtina waan afuraa, habeenkiina wakhtina waan tukadaa wakhtina waan seexdaa dumarkana waan guursadaa, sunnahaygana qofkii nacaa iga mid aha).

Markaa guurka oo la guursan waayaa waxaa ay ka dhigan tahay sunnihii nabiga oo laga tagay, culimada haddii qaarkood oo magac lihi ay guursan waayeen sida Sh. Al-islaam, Imaamu annawawi, Ibnu jariir iyo kuwa kale lagaga dayan maayo waayo waa sunnihii nabiga iyo anbiyadii hore.

Haddaba kitaabkan yar waa mid ka hadlaya arrimo gaar ah waxa uu ka hadlayaa mucaamalooyinka gaarka ah ama qarsoon ee dhex maraya lamaanaha laga bilaabo habeenka aqal galkooda iyo wixii ka danbeeya.

Waxaa jira kutubo badan oo laga qoray baabkan guurka, waxaanad arkaysaa culima iyo dakaatiro fara badan oo wax ka qoray guurka iyo faa'iidooyinkiisa, taasina waxa ay ina tusaysaa muhimada ballaadhan ee ku jirta guurka waayo waa

halka laga bilaabayo dhismaha ama aas-aaska reerka, waxa kale oo ay aad uga hadlaan casharada sirta ah ee u qarsoon lamaanaha ee ah jimaaca (galmada)-

iyo waxyaabaha ka horreeya, aad iyo aad ayay u sharaxaan oo ay u qaadaa dhigaan qaarkoodna kutub gaar ah ayay ka qoraan camaliyadan, waxa ugu caansan kutubta carabiga ah ee casrigan laga qoray: kitaabka la yidhaahdo Asraar al-jimaac, iyo kitaabka Asraar fi qurfatu al-nawm (secrets in bedrooms).

Xataa waxa aad arkaysaa qaar ka mid ah hooyooyinkii carbeed ee hablohooda la guursan jiray oo dardaarano siinaya hablohooda oo xataa kala hadlaya qaabka u fiican ee ay raggooda kula dhaqmayaan marka ay isku gaarka yihiin oo ay joogaan qolkooda hurdada.

Soomaali hadaynu nahay marka hore ma nihin dad wax qora oo wax allifa, hawlahan inaynu ka hadalaana agteena waxa ay ka tahay ceeb, taasina

waxa ay sababtay in maanta in badan oo ka mid ah da' yarteena in ay ka daawadaan hawlahan filimada la yidhaahdo sex-ka,

Waxaa ayaan darro ah in aynaan ka war hayn muslimiintii hore sida ay uga hadleen hawlahan galmada ee ay u bal-ballaadhiyeen. Mana aan arag Somalida wax ka hadlaya mawduucan marka laga reebo buug nin Somaliyi qoray oo la yidhaahdo (RAAXADA GUURKA).

Haddaba aniguna buug horaa jira oo aan ka qoray guurka, oo magiciisu yahay Badhaadhaha Guurka

iyo Aragtida Islaamka ee Hab Dhaqanka
Lamaanaha, buugan oo aan qoray 2012 anigoo xiligaa deganaa magaalada ceerigaabo iminkana halkan waxa aan rabaa in aan ku soo bandhigo buug kooban oo ka hadlaya (GALMADA)!! Iyo ciyaaraha ka horeeya aniga oo ku salaynaya aragtida shareecada islaamka ee ku wajahan arrimahan.

Aragtiyaha dadkeenu way kala duwan tahay, waxa aan arkay qaarkood oo yidhi sheekh ha qorin oo iska

daa, halka dad fara badani ay soo- dhoweynayaan in aan qoro oo weliba aan ku dhakhsado soo sariistiisa, sidaa daraadeed waxaa aan qaaatay fikraddda dadkan badan siiba dhalinyarada iyagu soo dhoweynaya, waxaa kale oo aan arkay sidii culimadeenii hore ay uga hadli jireen arimahan ee ay u balbalaadhin jireen iyo sida aynu inagu jahliga ugaga suganahay.

Buuggan yar waxa aan u hadeynaaya da'a yarta is guursanaysa ee leh ragga iyo dumarba si ay uga sii faa'iidaystaan oo markaa uu iftiimiyo waxyaalo fara badan oo ay ku adkaan lahayd in ay xitaa culimada weydiiyaan, mana dheereynayo oo waan koobaya si aan loogu daalin, waa midda kale e ka Soomaali ahaan waxba ma akhrino, markaa waxa aan ka dhigay buug aad u kooban in yarna lagu akhrin karo waxaan ugu tala galay dhamaan da'ayarta guursanaysa in ay qaataan si xisaabaha oo dhan halkaa ugala socdaan ama uga akhristan.

Waxa ay igu yidhaahdeen dadka qaarkoooda sheekhow waxan aad ka waramayso waa wax layska garan karo, oo qofka iskaga abuuran markaa maad iska daysid, laakiin kuwa caynkaa u hadlaya waxaa laga yaabaa wax fara badan oo ii muuqday in aanu iyaga u muuqan sida ay moodayaan waa ay ka balaadhan tahay.

Kitaabkan waa mid aan u daliishaday quraanka,axaadiista rasuulka iyo hadalladii

culimadii muslimiinta kuwii hore iyo kuwii dambeba

Magaca buuggu waa (Qolka Hurdada Qisooyin Iyo Cilmiyo Ku Duugan) Ilaahna waxa aan ka baryayaa in uu ku anfaco dhamaan da'ayarta Soomaaliyeed iyo xitaa cid kasta oo ka faa'iidaysta, anigana uu iigu daro miisaanka xasaanaadka maalinta qiiyaamaha.

Baraarujinta Uu Nabigu Inugu Baraarujiyey Guurka

Guurka fadligiisu waa mid aad uwayn, sidaa daraadeed

ayaa Nabigu (SCW) inagu baraarujiyey guurka, in aynu guursano waanakan xadiiskii oo turjuman:

(Anigu dumarka waan guursadaa, waan seexdaa xillina waan tukadaa, waanan ukacaa salaadda waqtina waan soomaa waqtina waan afuraa, qofkii ka weecda sunahayga igama mid maaha (bukhaari iyo muslim ayaa wariyey).

Xadiis kale waxa uu nabigu ku yidhi (SCW) sidatan:

(Kulanka dhalinyartaay kii awooda oo idinka mid ah guurka ha guursado, waayo araga ayuu laabid badan yahay xubinka tarankana waa uu ilaalin badan yahay, kii awoodi waayaana ha soomo waayo soonku gaashaan ayuu u yahay) “bukhari iyo muslim”.

Dumar la guursado waxa u fiican midda diinta leh: Nabigu (SCW) waxa uu inagu booriyay oo umadiisa uu ku dhiiri galiyay in ay guursadaan dumarka fiicfiican isla markaana diinta leh. Waxa ku

yaala Sunan al-nisaa'i xadiis uu macnihiisu yahay sidatan: (Abuu hurayra waxa laga wariyay in uu yidhi Rassuulka ayaa la waydiiyay dumarka tee u khayr badan waxaana uu yidhi rasuulku (SCW) "ta marka aad daymooto kaa farxisa, oo ku adeecda marka aad wax amarto, oo aan kugu khilafin wixii aad karaahiyaysanayso

xagga nafteeda iyo maalkaaga) "waxa wariyay Imamu Axmed"

Xadiis kale oo ay wariyeen bukhaari iyo muslim isna waa sidatan macnihiisu: (Nabiga SCW waxa laga wariyay dumarka waxa loo guursadaa afar xaaladood, maal ay leedahay dartii amaa qurux ay leedahay ama, reer sare (nasab) oo ay ka soo jeedo, amaba diin ay leedahay ee ku dadaal ta diinta leh).

Gabadhu marka ay tahay mid diin leh qayb libaax ayay ka qaadanaysaa tarbiyadda caruurta, waana madarasad dhan oo guriga fadhida, waxa ay soo saartaa ubad qaba tarbiyadii Islaamka , isla markaana

anfaca dalkooda iyo diintooda, waxa ay adeecdaa ninkeeda oo ay u noqotaa raaliyo, waayo waxa ay garanaysaa xaquuqda wayn ee uu ku leeyahay ninkeedu.

Rasuulku waxa uu lahaa isaga oo tilmamaya xuquuqda uu ninku ku leeyahay xaaskiisa: (haddii aan qof bani aadmi ah fari lahaa inuu qof kale u sujuudo cid aan Ilaahay ahayn, haweenayda ayaan fari lahaa in ay ninkeeda u sujuudo sababtuna waxa ay tahay xuquuqda wayn ee uu ku leeyahay). Sidaa daradeed waxa haboon lamanuhu in ay bartaan xuquuqda ay isku leeyihiin haddii kale waxa ay noqonaysaa xaaladii ay soomalidu ka maahmaahday ee ay yidhahdeen “Nin iyo gabadhii nabadna maaha colna maaha”.

Runtiina lama rabo in caynkaas la noqdo waayo isjacaylkii Rabi sheegay ee u dhaxaynayay lamaanaha ma jiraayo, waxaanay noqonayaan laba qof oo meherku uun isugu xidhan yahay laakiin aan

helin macaankii guurka, waxaanay ahaanayaan dad caynkaasa oo mar walba is hiifaaya in ay ubadkooda tarbiyadeeyaan iska dhaafoo, runtii waxaynu u baahanahay in aynu noqono dad is jecel oo xataa haddii ay duruufi keento isu bixin kara xataa xubnohooda qaaliga ah qaar ka mid ah. Sidee Ayay Haweenaydu Ku Kasban Kartaa Ninkeeda:

Arimahan hoos ku cad haddii ay dabaqdo –raacdo-gabadhu waxa ay kasban kartaa ninkeeda waana kuwan hoos ku sheegan: In ay Rabigeeda adeecdo

Ninkeeda oo ay adeecdo kana ag dhawaato
Macsiyada oo ay faraha ka qaado-
Gurigeeda iyo nafteeda oo ay nadiifiso, waa inay noqotaa haweenaydu mid gurigeeda iyo xaga nafteedaba aan ka ahayn basari

Caruurteeda oo ay tarbiyadayso tarbiyad fiican oo Islaamka waafaqsan.

Ninkeeda oo ay ku qaabisho waji furfurnaan iyadoo ku dadaalaysa asbaabta keenaysa inuu ku raaxaysto.

In ay dareensiiso ninkeeda ixtiraam iyo jacayl ay u hayso.

In ay ilaaliso qaraabada iyo xigtada ninkeeda oo ay ixtiraamto qadariso gaar ahaan labadiisa waalid iyo walaalihii.

In ay noqoto mid dabeecad fiican kula dhaqanta ninkeeda iyada oo aan hadalkeeda ka saraysiinayn kiisa, gaar ahaan marka uu hor joogo caruurtiisa iyo qarabadiisa, waayo waxa uu dareemi karaa bahdil ay ku hor bahdilayso,

Nabiguna SCW waxa uu aad ugu booriyay dabeecadda fiican waxaanuu yidhi: (Shayga ugu culus miisaanka qofka maalinta qiyaamaha waa dabeecada fiican).

Ilaahna waa uu u cadhoodaa midka hadalka xun ee isku kallifa. “waxa wariyay xadiiskan Abu da’ud iyo Altarmadi”.

Xadiis kale oo uu wariyay Abuu Hurayra waxa uu sheegayaa in rasuulku SCW la waydiiyay waxa ugu badan ee qofka janada galiya waxaanu yidhi: (Cabsida Alle iyo dabeecada fiican) axaadiista ku soo

aroortay dabeecada fiicani waa mid aad u tiro badan.

Side Ayuu Ninku Ku Kasban Karaa Xaaskiisa: Sidoo kale ninkuna xaaskiisa waxa uu ku kasban karaa haddii uu raaco qodobadan hoos ku cad:-

- In uu noqdo nin xaaskiisa mar walba u nasteexeeya.
- In uu noqdo mid dabeecad iyo dhaqaan fiican kula dhaqma.
- In aanu noqonin bakhayl xaaskiisa kala bakhayla.
- In aanuu cidna dareensiinin khilaafaadka yaryar ee dhexdooda yaala.
- In aanuu hadal xun kula hadlin qaraabada xaaskiisa.
- In aanu xaaskiisa ku bahdilin dadka kale hortooda.
- In uu xaaskiisa u muujiyo furfurnaan waayo dumarku kama helaan waji macbuuska una samee waqtiyo aad la yar ciyaarto.

- In aad hadyadaha u qaado waayo waa la isku jeclada.

Doobnimadu waa shar iyo balaayo

Waxa uu yidhi Imaamu Axmed Allah haka raali noqdee isagoo kawaramaya dhibta ay leedahay isagoo qofku noolaado bilaa lamaane iyo sida aanay ugu fiicnayn Islamka dhexdiisa hadalkan hoos kusheegan: (Doobnimadu Islaamka kamid maaha Nebiguna SCW waxa uu guursaday 14 dumar ah, waxaanu kadhintay sagaal, oo meherku ugu xidhan yahay hadii ay dadku kategi lahaayeen guurka majireen duulimaad iyo Jihaad laqaadi lahaa, Xajna majireen waxaa iyo waxaasina majireen, wax badan oo kale ayuu tiriyey, Nebiguna waxa uu ahaa mid waabariista iyada oo guryihiisa wax lacunaa aanay oolin, hadana caynkaas oo ay tahay waxa uu kawafaaday sagaal dumar ah waxaanu ahaa mid guurka dadka kubooriya waxaanu kareebi jiray inay

kagoaan aduunyadda iyo guurka oo ay cibaado kaliya ugo'aan, qofkiisa sunihiisa kaweecadana waa mid aan xaq kutaagnayn halkan ayuu kudhamaaday-hadalkii Imaamku. Waxa kale oo laga wariyey imaamku inuu yidhi raashinka waan kamaarmi karaa laakin dumarka kama maarmi karo, culimada muslimiintuna guurka iyo wanaagiisa iyo axkaantiisa aad ayey ucadeeyeen.

CASHARO XASAASI AH (Galmada Iyo Waxyaalaha Ka Horeeya)

Habeenka Aqalgalka:

Habeenka isugu horaysa lamanaha waa haben khatartiisa leh caruusada waxa ku jira cabsi waayo guriga ay u wareegtay waa mid cusub nin aanay wada noolan jirin ayaa nolosha la wadaagaya, xaalada oo dhan ayaa is bedeshay, haddi ay kaligeed sariirta seexan jirtay ama furaashka waa lala wadaagayaa, cida la wadagaysa maaha qof dumar

ah ee waa nin, ninka waxa uu rabaa meel kasta iyo xubin kasta oo jidhkeeda ka mid ah inuu ku raxaysto, sida isaguba uu rabo in yaduna ay la- wadaagto raxaysigaa, dhinac kale, haddi aynu ka eegno habeenkan raga qaarkood cabsi ayaa ku dhacda, qaar waxa ay ka baqanayaan fashilaadi in ay u timaado, hawl ayuu galayaa dagaal qabaw ayuu galayaa wax kaga soo bixina ma garanayo, inanta uu guursanayaa haddi aanay ahayn carmal waxa uu ku mashquulayaa sidii uu uga takhalusi lahaa habeenkaa jabinta bikirka {waa xuubka Rabi ku asturay farjiga inanta}.

habeenkaa qaarkood naxdin ayaa ku dhacda, dhinac kale, haddi aynu ka eegno inanka iyo inantuba waa ay faraxsan yihiin, dadka oo dhan ayaa u shaqaynaya, salaanta iyo ducada ayaa ku badan, inanku waa mid sifo sharci ah ku guursaday inanta, kasooni buuxdana wuu iska qabaa, dhib u arki maayo xaaladaha uu galayo, waa mid kasii

gaashantay, inanta lafteeduna waa sida ay iska dhigto, qaar badan ayaa iska caadi ah, inkasta oo kolay inantu ay tahay mid khajilaysa habenka hore, waayo may arki jirin nin taataabta, dhunkada, hawlo badana samaynaya, si kastaba ha ahaatee, farxadiisa iyo naxdintiisa labadaba waa uu iska leeyahay habeenkani, sidaa daradeed ayaa culimada baabkan wax ka qortaa ay in badan ka faaloodan habeenkan, qaarkood talooyin ayay bixiyaan oo ay siiyaan lamaanaha, waxa ka mid talooyinka ay siiyaan caruuska in aanuu isku mashquulin habeenkaa sidii uu uga takhalusi lahaa bikirka jabintiisa, xataa haddii uu ka takhaluso habeenkaa in badan ma helayo macaankii ay lahayd galmadu, waxa ka mid ah talooyinka in aanu ku degdegin xaaskiisa, waa inuu siiyaa sharaab ay jeceshahay oo kale ciyaaraha aynu ka warami doono waa in uu ku mashquuliyaa, waa inuu guriga warwareejiyaa, markiiba yaanuu kula degdegin qolka hurdada, haddi ay suurtoobayso

qolka fadhiga ha kula caweyo, ka saar cabsida-qalbigeeda, waa inuu u kacaa sidii uu dharka u bedelan lahaa xamamka isaga gali lahaa.

Ducada Marka Ugu Horaysa Ee Ay Isu Soo Galaan:

Haddii aynu sawir kooban ka bixinay habeenkan waxa ay tahay talaabada ku xigtaa in marka ugu horaysa ee lamanahu isu soo galaan uu ku dhago fooda amaba madaxa intiisa hore isla markana uu ku ducaysto ducadii rasuulka oo ah sidatan:-

((اللهم إني أسألك من خيرها وخير ما جبلت عليه وأعود بك من شرها ومن شر ما جبلت عليه)).

Macnaha ducadu wax uu yahay sidatan: ((Alahayaw waxa aan ku waydiisanayaa khayrkeeda iyo khayrka aad ku abuurtay, waxanan kaa magan galayaa sharkeeda iyo sharka aad ku abuurtay))

Salaadda Lamanuhu Ay Isku Xidhanayan:

Waxa sune ah oo ah talaabada xigta ducada in ay isku xidhaan lamanuhu labo ragcadood oo sune ah waana shay ka sugnaaday saxaabadii waxaana ku soo arooray labo asar.

Ciyaraha Ka Horeeya Galmada:

Salaadda sunaha ah marka la tukado waxa la gudo galayaa hawshii waynayd ee galmada sida daradeed, waxa lagama marmaana in la ciyaarsiiyo xaaska, axadiis ayaana ku soo aroortay in la ciyaaro waxaana ka mid ah xadiska laga wariyay Jabir binu Cabdilahi oo ah sidatan:

وعن جابر بن عبد الله الأنصاري قال: كنّا مع النبي صلى الله عليه وسلم))في غزوة فلما رجعنا وكنا قريبا من المدينة قلت:يا رسول الله إني حديث عهد بعرس قال:" أتزوجت" قلت نعم ز قال: "أبكر أم ثيب" قلت بل ثيب قال : "فهلا بكرا تلاعبها وتلاعبك((

وفي رواية:فقلت: "ثيبا" فقال : ""ما لك وللعذارى ولعابها، وفي رواية أخرى ""فهلا تلاعبك وتلاعبها أو قال تضاحك وتضاحكها"" الحديث(((

رواه البخاري ومسلم وغيرهما

Xadiiskani waxa uu leeyahy oo uu wariyay Jabir

Nabiga ayaan la soconay dagal kaddib markii-aanu soo noqonay ee aanu madiina u dhawnahay ayaan idhi Rasuulkii allow nin aroos cusub ku jira ayaan ahay, waxuu markaa I waydiiyay ""miyaad guursatay" haa ayaan idhi, waxa uu hadaana I waydiiyay "ma gashaanti mise carmal"" waxaan idhi carmal ayaan guursaday, waxa uu markaa igu yidhi "maxad gashanti u guursan wayday kula ciyaarta adna aad la ciyaarto " riwaayadda kale ee xadiisku waxa ay sheegaysaa "maxad mooday gashantimaha iyo dhareerkooda" halka riwaayadda kalena ay leedahay "gashanti kaa qoslisa adna aad ka qosliso.

Waa kan isna asar kale ((عليكم بالأبكار فإنهنّ أعذب أفواها وأنتق أرحاما واسخن إقبالا وأرضى باليسير وأقبل خبئا))

Asarkan macnihiisu waxa uu yahay waxad ogatan gashantimaha waayo iyaga ayaa af macan oo xaga ilmo galeenkana saafisan oo soo jeedkooduna uu yahay mid kulul oo diiran oo ah kuwo ku raali ahansho badan

waxa yare e la siiyo oo xagga khiyamadooduna ay yartahay .

Cilmi baadhis badan markii la sameeyay waxa ay sheegaysaa in gabadhu ay u bahan tahay marka hawshan la gudo galayo ciyaar faro badan dhunkashooyin iyo wixii la jira ugu yaraan 15-20 daqiiqo si ay markaa gabadhu u gu diyaar garwdo oo hamadeedu ay u kacdo, galmaduna ma noqonayso mid u raxaysa gabadha haddii aanay ciyaaro ka horaynin, waxanay sheegaan in badan oo dumarka ah in anay gaadhin macanka galmada haddii aanay ciyaaruhu ka horaynin, mar kasta oo ninku isku dayo in uu xaaskisa ku qanciyo galmada kuma qancin karo ciyaar la'aan. Waxa uu leeyahay Ibnu Qayim isaga oo ka waramaya ciyarahan (waxa haboon in galmada ay ka horayso ciyaaro ciyaarahasoo ah dhunkashada la dhunkanayo iyo carabkeeda oo la jaqayo, Rasuulkuna waxa uu ahaa SCW mid xaaskiisa la ciyaara oo dhunkada waana kan xadiisku:-

كان رسول الله صلى الله عليه وسلم يلاعب أهله ويقبلها وروى أبو داود))في سننه أنه صلى الله عليه وسلم كان يقبل عائشة ويمصّ لسانها رواه أحمد وأبو داود((

Rasuulku SCW waxa uu diiday oo uu dadka ka nahyiyay in labada qof ay isku boodaan marka ay isu tagayan.

Waxyaalaha Ka Horeeya Galmada:

Culimada musliimintu marka ay ka hadlayaan camaliyadda al-jinsiyah(galmada) waxa ay aad ubalbalaadhiyaan waxyaabaha ka horeeya oo ay muhiim tahay in laga horaysiiyo, si uu u noqdo isu taga lamaanuhu mid ay ku raaxaystaan, waxaa ayaan darro weyn ah sida inagu aynan u aqoon haddi aynu nahay Soomaali in badan ragga guursanaya hamigoodu waxa uu yahay marka u horeysa ee xaaskiisa uu usoo galo in uu ku boodo, oo dhaqanadeeni hore hadaad eegto gaar ahaan dadkeenii reer guuraaga ahaa may aqoonin waxyaalahan ka horeeya,

waxaana dhex mari jirey lamaanaha habenkaas u horaya dagaal culus oo cir iyo dhul ah, ninku waxa uu ku dadaalayey gabadhaa in uu utago uun oo uu beerka kaga habsado isla markaana uu habeenkaaba uu jabiyo bikirkeeda, halka iyadu ay difaac gelaysay, meelaha qaarkoodana waxaad maqlaysaa habeenkii hebel aqal-galay waa kii utaag heli waayey gabadhii oo loo soo gurmaday, waa ceeb in xaaskaagii laguu qabto oo aad sidaa aad ugu tagto, halkii la rabay labada qofi in ay saani u baashaalaan u ciyaaran. Haddaba waxyaabaha ka horeeya galmada waa kuwan hoos ku sheegan:

Isqurxinta:

Isqurxinta labada qof midba midka kale uu isu soo qurxiyo, sidaa daraadeed ayaa shareecada Islaamku ay ina faraysaa in lays qurxiyo wax udgoona la marsado, Sidaa daraadeed,

waxaa ku waajib ah in ay gabdhu ku dadaasho marka ay ninkeeda hor imanayso.

Maryo dhigashada

Ma fiicna in lammaanuhu ay isu tagaan iyaga oo dhar gashan waayo raaxaysi dhamaystiran heli maayaan laakiin waxa fiican in ay is qaawiyaan.

Ciyaaraha Lamaanaha

Marka laga hadlayo howshan galmada waxaa loo qeybiyaa saddex qeybood, qeyb ahaani waa ciyaaraha ka horeeya, qeybina waa galmada laftigeedii oo ah xubinka oo xubinka la geliyo, qeybina waa marxaladda ka danbeysa galmada. Hadaba ciyaaraha ka horeeya galmadu waa kuwo aad iyo aad u muhiim ah waxa anaay sheegaysaa daraasaddo badan ee la sameeyay in gabadhu ay u baahan tahay ciyaar inta aan loo galmoon 15-20 daqiiqo si ay gabadhu u noqoto mid u diyaar ah howsha galmada

isla markaana hamadeedu ay u- kacdo, waayo kicidda hamada gabdhu waa ay ka danbaysaa ta ninka galmaduna ma aha mid gabdhu ay ku raaxaysan karto haddii anaay ciyaarahani ka hora marin.

Dhunkashada ayaa ah ta ugu horeysa ciyaaraha waa in ay is weydaarsadaan dhunkashooyin kulkulul, waxaana ugu fiican dhunkashada afka waxaa kaloo bannaan in carabka layska jaqo waayo waxaa ku soo arooray xadiiskii Rasuulka in uu muudmuudsan jirey carabkii caasha.

Kol haddi lamanuhu ay ku gaar noqdeen qolkooda hurdada, talaabooyinkaa horana uu ku kacay ninku oo ah in uu ku dhago foodda xaaskiisa marka ugu horaysa ee ay isu soo galaan, ducadii aynu soo sheegnayna uu akhristo isla markaana ay isku xidhaan labadii ragcadood ee sunaha ahaa, waxa ay u diyaar garoobayaan waa hawshii waynayd ee isu galmoodka, waxaana aad iyo aad u mihiima halkan marka ay xaladdu soo gaadho , ninku waa- mid uu

aad u kacsan yahay hamadiisu sidaa daradeed waxa la rabaa raxaysiga galmada in aanuu isagu isku gaar yelin, laakiin waa in ay la wadaagtaa jacaylkiisa ay nolosha wadagayaan. Hamada xaasku hore uma kacdo waxaa loo baahan yahay in aad kiciso hamadeeda sidaa darteed waxa sharci ah oo diinteenu sheegaysaa in adan ku boodin markiiba, axaadiis ku soo aroortayna waa jirtaa, waa cadaalad daro arintaaasi lagana yaabee rag fara badani in aanay aqoon amaba aanay danayn ciyaaraha ka horeeya galmoodka, kutubta arimahan ka hadashaana kuwii hore iyo kuwan danbaba aad ayay u balbalaadhiyaan, culimada muslimiintuna aad ayay uga hadlaan, axaadista Rasuulkuna waa mid sheegaysa in ciyaaro lala yimaado, isla markaana aan gabadha lagu boodinuun, waxa kale oo aad qalbiga ku haynaysaa marka ay halkan soo gaadho in aad akhrisato ducadii uu rasuulku ina baray marka ninku u tagayo xaaskiisa ducadiina waa sidatan:

روى البخاري ومسلم وأحمد واصحاب السنن وغيرهم عن عبد الله بن عباس رضي الله عنهما:أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال:)) لو أن أحدكم إذا أتى اهله قال بسم الله اللهم جنبنا الشيطان،وجنب الشيطان ما رزقتنا فإن قدر بينهما في ذلك ولد لم يضره ذلك الولد الشيطان أبدا((

Xadiiskan oo ay wariyeen Bukhaari, Muslim, Axmed Asxaabta sunanka iyo qayrkoodba oo uu wariyay saxaabigii C/laahi binu cabaas, Rasuulku waxa uu yidhi SCW ((haddi midkiin marka uu u tagayo "u galmoonayo xaaskiisa" uu yidhahdo bisinkii Alle ayaan ku bilabanayaa hawshan, Allahayaw naga dheere shaydaanka oo ka dheeree wixii aad nagu arsaaqdo,

haddii caruuri u calool gasho ma dhibo shydaanku waligii))

Markaa ducadan waa in ay qalbiga kuugu jirtaa laga soo bilaabo marka aad isla gashaan qolkiina gaarka ah.

Hadaba ciyaartan lamanuhu ay wada ciyarayaan maxay tahay?

Ciyaartu marka hore waxa ku cad xadiiskan rasuulka SCW:

))ومن حديث جابر بن عبد الله الأنصاري قال:كنا مع النبي صلى الله عليه وسلم في غزوة فلما رجعنا وكنا قريبا من المدينة، قلت يا رسول الله إني حديث عهد بعرس قال:)أتزوجت(قلت "نعم" قال:)أبكر أم ثيب(قلت: "بل ثيب" قال:)فهلا بكرا تلاعبها وتلاعبك(، وفي رواية فقلت "ثيبا " فقال:)ما لك وللعذارى ولعابها(صحيح رواه البخاري ومسلم.((

Xadiiskan oo ay wariyeen Bukhaari, Muslim iyo qayrkoodba waxa uu leeyahay saxabiga wariyayna waa Jaabir binu cabdilahi waxa uu leeyahy waxanu la joognay Rasuulka SCW oo aan la socdo dagaal, haddaba goortii aanuu soo noqonay ee aanu ku dhawnahay madiina ayaan ku idhi “rasuulki Allaw waxaan ahay caruus cusub” , markaas ayuu yidhi “miyaad guursatay?” aniguna: haa ayaan idhi, waxa uu igu yidhi “ma gashaanti mise carmal?”, waxaan ku idhi “carmal ayaan guursaday”, waxa uu igu yidhi: “maxaad u guursan wayday gashaanti kula ciyaarta adna aad la ciyarto” riwaayad kale oo- xadiiska ka mid

ahayd waxa ay sheegaysay “maxad mooday gashaantimaha iyo dhareerkooda”. Waxa uu leeyahay kitaabka تحفة العروس ee ay qoreen labada Sheikh ee Majdi Maxamed iyo Cabdicasis marka ay sheegayaan xadiiskan waxay leeyihiin sidatan:

(Xadiiskani waxa uu sheegayaa in gabadha laga jiqi karo carabka iyo dibnaha markaasina waa xaaladda la wada ciyarayo).

Haddaba ciyaaraha galmada ka horeeya waxa looga jeedaa dhunkashooyin iyo wixii kale ee raaca ee keenaya in Hamada gabadhu kacdo, laakiin wax kale loogama jeedo ciyaarahan.

Waxa uu leeyahay Shiikha leh kitaabka "المغني" hadal macnihiisu yahay sidataan: (waxa la suneeyaa in uu ninku la ciyaaro xaaskiisa inta aanuu u galmoon si ay u kacdo hamadeedu oo ay u gaadho macaansiga galmada sida uu isaguba uu u gaadhayo,

waxaanay xusaan kutubta qaakood in ciyaarahani ay ka muhiimsan yihiin galmada lafteeda balse qaarkood ayaa sheegaya in dumarka qaarkood ay ka jecel yihiin ciyaaraha .

Ciyaartu waa shay aad iyo aad u daruuri ah, waxaanay noqon kartaa hadal iyo ficil labadaba, ujeedaduna waxa ay tahay in la kiciyo Hamada xaaska waana sidan hoos ku xusan:-

- Isdhunkasho ay lamanuhu is waydarsanayan dhunkashooyin, waxaana u fiican dhunkashada la iska dhunkado afka dhabankuna waa uu fiican yahay, waxa banaan in markaa xataa carabka la iska jiqi karo sida ku soo aroortay xadiiskii sheegaayay in uu Rasuulku jiqi jiray carabka caaisha.
- Tuutuujinnta naasaha waxa aad u muhiim ah in uu ninku ku ciyaaro naasaha xaaskiisa oo uu tuutuujiyo, faraha oo kale ayuu ku-

salaxayaa ama uu ka dhunkanayaa, waxa kale oo u banaan xataa inuu jiqi karo naasaha.

Hadaladan aan idinku akhriyayaa waa wax aan idiinka soo rarayo kutubo fara badan oo ka mid ah kutubta arimahan wax ka qorta ee la yidha tuxfayaasha, markaa ciyaarihii ayaynu wali ku dhex jirnaaye waxa fiican oo ka mid ah ciyaaraha in loogu sheekeeyo xaaska hadalo macmacaan sida waan ku jecelahay, jacaylkaygii, qalbigaygii, noloshaydii iyo wixii la mida.

Waqti dheer waa in hadalan lagu wadaa hadii ay suurtawdo, hadalka jilicsani waa mid kicinaya hamadaeeda xataa eegmada lafteeda oo kolba uu eegaa waa nooc ka mid ah ciyaaraha, taataabashada jidhkeeda ayaaa isna ka mid ah ciyaaraha, dhunkashooyinka oo aan meel ku gaar ahayn laakiin larabo- inuu kolba meel ka dhunkado sida dhabanka afka qoorta, garabka iyo wixii la mida isaga oo ku dheehaya hadalkii

- jiljilicsanaa waxa markaa kordhaya in ay samayso neefsi badan, waxa iyana muhiim ah in la taataabto dhulka xasaasiga ah sida naasaha, culimadu waxa ay sheegaan in ay banantahay in laga jiqi karo culimada muslimiintuna waa ay ka hadleen kuwii hore iyo kuwan danbaba, culimadan danbe waxa ka mid ah culimada sucudiga ee lo yaqaano "اللجنة الدائمة" oo uu ka mid ahaa shiikhii waynaa ee ibnu baas waxanay sheegayaan in gabadha naaska laga jiqi karo.
- Waxa iyana muhiim ah in ciyaaruhu ilaa meelaha hoose usii talaban caloosha xundhurta bawdyaha iyo wixii la mida, waxa la rabaa galmadu in ay noqoto ta sheekada lagu gabagabaynayo.

Muhimadda Ay Leedahay Ku Ciyaaridda Xubinka Taranku:

Waxa ay xusaan kutubtan danbe iyo kuwii horaba marka ay ka hadlayaan ciyaarahan in ay muhiim tahay in lamanahu midba ka kale uu ku ciyaari karo

xubinkiisa taranka waana arin banaan sharciyan oo wax diidayaa ma jiro. Hadalka Uu Ka Yidhi Sheikh Abuu Xaniifa Ku Ciyaaridda Xubinka Taranka:

Sheikh abuu Xaniifa oo ka mid ahaa culimadii waawaynayd ee muslimiinta, isla markaana ka mid ahaa afartii imam ee lahaa afarta mad habood, ayaa la waydiiyay su'aashan hoos ku xusan:

(Sheikh abuu xaniifa ninku xaaskiisa ma taataaban karaa xubinkeeda taranka, iyadu se ma taatabankartaa? Waxaanuu ku jawaabay dhib ma laha walibana waxaan rajaynayaa in ajarkoodu badanayo.

Muhimadda Uu Leeyahay Ku Ciyaaridda Xubinka dumarka ee aadka u Dareenka Badan

Waxa ay xusaan culimadu marka lagu ciyaarayo xubinka taranka dumarka in ay sii muhiimsan tahay xubinka yaree ku dhex yaala ee darenka badan in lagu ciyaaro xubinkaasoo Soomali ahaan aynu u naqaano "kintir" afka carabigana lagu yidhahdo "البظر" .

Kutubtu marka ay ka hadlayso xubinkan aad ayay ugu dheeradan warkiisa waxanay sheegaan inuu aad iyo aad u dareen badan yahay si aada ayuu uga hadlay shiikha al Istanbuuli kitaabkiisa la yidhahdo tuxfaha.

Waxay sheegaan xubinkani inuu xataa istaagi karo sida xubinka taranka ragga, isaga oo Rabbi uu ku mansheeyay xidido aad u tiro badan xataa waxay sheegaan inuu casaado sidii wax dhiigay oo uu bararo.

Ciyaarahaa waxa ka mid ah in xataa xamamka dhexdiisa lagu wada ciyaaro:

Waxa laga wariyay Caaisha in ay tidhi aniga iyo Rasuulka ayaa ku wada maydhan jirnay xamaamka markaas ayuu biyaha iga boobi jiray oo aan odhan jiray iidaa iidaa.

Fiiro gaar ah:

Suurto gal ma tahay haddii aynu soomali nahay in aynu samayno arintan oo kale oo ninku xaaskiisa uu biyaha dhexdooda kula ciyaari karo, way adagtahay

laakiin waa dhici kartaa dadka qaarkood in ay sameeyaan waxaad ka garan kartaa xadiiskan sida rasuulku uu u raali galin jiray xaasaskiisa.

Jacaylka ay dumarku jecel yihiin qaniinyooyinka yar yar Kitaabka layidhaahdo Asraar Al-jimaac marka uu ka hadlayo ciyaaraha kahoreeya galmada waxa uu xusaa sida ay dumarku ujecel yihiin ama uga- helaan qaniinyooyinka yar yar, maaha mid wayn oo dhaawac ugeysata laakin waa mid kutusaysa jacaylka iyo xiisaha ay raggu jecel yihiin dumarkooda, islamarkaana dumarkuna ay kahelayaan, waana qayb kamida ciyaaraha, waxaa kamida kitaabkaasi marka uu kahadlayo arintaas hadal macnihiisu yahay sidatan (Maxaa kabadan casaanka ama guduudnaanta kamuuqata cududaha dumarka taasina waxay kutusinaysaa sida ay ragu isu iloobaan markay howlahan guda galaan.

Maxaa xal u ah ninka markiiba soo tuuraya biyaha isla markaana xaaskiisu ay tahay mid ay biyehedu raagayaaan: Sida ku cad kitabka tuxfaha ee ay wada qoreen labadii wadaad ee aynu soo sheegnay bayjkiisa afar iyo lixdan waxaa ku cad hadalkan:

(waxa dhici karta in gabadha biyaheedu ragayaan, halka ninka biyihiisu ay soo degdegayaan,-

ma aanan ku arag kutubta muslimiinta ee loo noqdo mid qudha oo ka hadlaya arintaa dawaynteda, marka laga reebo sheekha la yidhahdo Sayid Murtada Alxusayni Alsabiidhi, shiikhani waxa uuu dhintay 1205 taariikhda hijriga oo waafaqsan 1790 miiladiga waxaanuu ku sheegay kitabkiisa la yidhahdo Alitxaaf ee uu ku sharxayo kitabka "noolaynta culumta diinta " ee uu leeyahay alqasaali waxaanuu yidhi hadal uu macnihiisu yahay sidatan:

(haddii uu ninku yahay mid markiiba ay ka imanayaan biyuhu xaaskiisuna tahay mid ay

raagayaan biyeheedu waxa la gudboon in uu dheereeyo ciyaarta uu la ciyaarayo furaashka korkiisa oo uu badiyo inuu isku dhajiyo iyo inuu ka jaqo dibnaha isla markana uu ku ciyaaro naseheeda, isla markana uu taatabto badhideeda, dhabarkeeda intiisa sare, labadeeda kalyood marka uu dabadeed ku arko isbedel waxa uu ku- jajabinayaa ama uu marmarinayaa madaxa xubinkiisa taranka iyada xubinkeeda xaaladaas ayuu ku haynayaa intii mudo ah isaga oo aan galinayn marka isbedel midabkeeda uu ku arko amaba gariir oo ay isku dhajiso xubinkii ayuu u galinayaa inyar inyar ilaa salkisa ayuu wadayaa, waxaanu u dhaqdhaqajinayaa si adag kamana soo sarayo, haddi ay markaa jirto gabadh biyehedu raagan markaa biyuhu si toosa ayay uga imanayaan isla xaladaa way ka imanayan biyuhu

hadalkii shiikha oo qorana waa akn :

)وقد تكون الزوجة بطيئة في الوصول إلى قمة اللذة ولم نجد في المصادر الإسلامية من تعرض لهذه اتلمشكلة بحل علمي سوى السيد مرتضى الحسينى الزبيدي المتوفى سنة 1205هـ 1790م في كتابه "إتحاف السادة المتقين

بشرح إحياء علوم الدين للغزالي" فقال: إذا كان الزوج سريه الإنزال والزوجة بطيئة فعليه أن يطيل مداعبتها على الفراش ويكثر من إتزامها "حضنها" ومس شفتيها والعبث بثدييها وتحسّس إليتيها وأعلى ظهرها وجنبيها، فإذا بدا عليها التغير دلك بظرها برأس ذكره الهويني ويستمر على هذه الحالة دون إيلاج فإذا ارتعدت وتغير لونها وتقلص وجهها والتزمته أولجه رويدا رويد حتى يصل إلى الأخر ويحركه بشدة دون إخراج يعني في موضعه فإنه لا توجد امرأة بطيئة إلا أنزلت في هذه اللحظة.

Galmada:

Haddii aynu ciyaarihii dhaafnay oo lamanihii mid waliba hamadiisii ay kacday isla markana uu galmadii diyaar u yahay waxa ay tahay talabada ku xigtaa halkii loo socday ciyaaruhuna ay hordhac ama gogoldhig u ahaayeen, galmada oo ah in la is galiyo labada xubin ee taranka halka sharecadeenu ay ogoshahay ee la isaga galmoon karana waa xaga hore oo kaliya xaga danbe maya sida aynu dib ka sheegi doono Allena kor ahaaye waxa uu sheegayaa in dumarku ay yihiin meesha wax lagu beeranayo meeshaa ilmuhu ka oo baxayaana waxa la yaqaanaa in ay tahay xaga hore sidaa daradeed Alle waxa uu leeyahay (dumarkiina waxa aad ugu kalaydan sida aad doontaan) iyadoo meesha loo socdaana ay

tahay xaga hore oo kaliya, qaab alaale qaabkii ay doonan lamanuhu ayay isugu tagi karan, haddii la doono dhinaca hore ayaa lagaga imanayaa, xaga danbe dhinacdhinac, istaag, jiif, sidaa awgeed, ayay culimadu sheegaan oo soo- raraan xaalado faro badan oo la isugu tagi karo iyadoo aayadan quraan ah ka shidaal qaadanaya, qaarkood waxa ay gadhsiiyaan in ka badan labatan xaladood in la isugu tagi karo qaarkood way ka sii badin karaan labatan.

Waxa aynu ka tilmami doonaa ila dhawr iyo toban qaab.

Inagu hadii aynu nahay soomali waxa laga yaabaa in aynaan aqoon ilaa xaaladda iska calamiga ah ee la wada yaqaan mooyane oo ah in ay gabadhu cirka eegto ninkuna uu ka sareeyo lakiin waxa fiican ayay yidhahdaan culimadu in kolba xalad hawsha loo wado.

Waajibnimada Galmada:

waxaa kamida waajibaadka ninka saraan inuu ugalmoodo xaaskiisa, si uu baahideeda xagga galmada u awdo, islamarkaana ay hesho macaansiga galmada oo ay uga maaranto inay- ragga kale uhanqal taagto waayo baahideeda hadii uu buuxin waayo waxaa dhici karta inay ragga kale xaaraan ku doonto oo ay halkaa mushkilado iyo ciqaab Rabbi uga dhacdo, hadaba culimadu maxay kayidhaahdeen ugalmoodka xaaska loo galmoodo.

Culimada fuqahada layidhaadaa waxay isku khilaafaan ninka xaaskiisa ugalmooda xukunkeeda iyo inta jeer ee larabo inuu ugalmoodo Qolo waxay yidhaahdeen waajib kuma ah ninku inuu xaaskiisa ugalmoodo, waa xaq hadii uu doono uu fulinaayo, hadii uu doonona uu kategi karo. Hadalkani waa kan ugu daciifsan waayo Quraanka, sunaha Nebiga iyo ijmaaca culimadu waa kuwo khilaafsan oo kasoo horjeeda, xagga Quraanka Alle waxa uu kusheegay

aayad Quraan ah sidatan, waxa uu sheegay Rabbi in dumakru xaqa ay raggu kuleeyihiin oo kale ay iyana ku leeyihiin markaa

Rabbi waxa uu sheegay in gabadha uu usugnaanayo xaqa iyagaba iyagaba ragoodu kuyeelanayaan markaa ninku inuu xaaskiisa inuuu ugalmoodaa haday tahay xaq kamida xuquuqda iyo waajibaadka uu xasaaskiisa kuleeyahay, dee waxa xaq iyana ah in iyana sidoo kale ay kuleedahay, mida kale, Allaah subxaanuhuye waxa uu sheegay in raggu dumarka si fiica ula dhaqmaan, Markaa ladhaqanka fiican waxaa kasoo horjeeda inuu ninku qabo xaas yar oo ah shabad una baahan ninkeeda sida uu ugu baahan yahay si kasii badan hadana aanu dhadhansiinayn oo aanu kabaahi tirayn wixii ay ubaahnayd oo galmoodkii ah waa arin kafog cadaaladda Islamaanka ee fiican. Qolo kale iyana waxay yidhaahdeen cimrigiisa inta uu nool yahay hal mar ayay kuwaajib tahay inuu ugalmoodo. Hadalkan laftiisu waa baadil sida ay sheegeen culimadu qaarkood waxay yidhaahdeen lixdii biloodba waa inuu mar utagaa-

Qolo saddexaad waxa ay yidhaahdeen waxaa kuwaajib ah afartii biloodba inuu hal mar ugalmoodo,

Culimadu qaarkood waxay yidhaahdeen afartii cisho waa inuu hal mar u tago

Culimada u badani waxay yidhaadeen waana sida saxiixa ah ninka waxa kuwaajib ah inuu galmoodo xaaskiisa hadii aanu jirin cudurdaar, waxa uu yidhi Shiikha weyn ee magiciisu yahay Ibnu Xasmi Aldaahiri, hadalkan hoos ku cad (waxa waajib ku ah inuu ugalmoodo xaaskii, waxaana ugu yar hal mar markasta oo ay tahay daahir inuu hal mar utago, hadii uu awoodo, hadii markaa isaga oo awoodaya utegiwaayo wuu kudanbaabayaa arintaa waxaana udaliila ayuu yidhi: ayaadda macneheedu yahay sidata: (Markii ay daahir noqdaan uga taga xagii

Rabbi idin amray)

Khatarta ka imankarta hadii xaaska loo galmoon waayo:

Galmadu waa xaq Rabbi kuwaajibiyey ragga sida raajixa ah wax Alle wixii Rabbi waajibiyeyna waxaa

kusugan khayr farabadan, qofkii kagaabiya waajibkaana naftiisa waxa uu usoo jiidayaa dhibaato, markaa qofkii kagaabiya ugalmoodka xaaskiisa waxa uu soo jiidayaa dhib, waxaanu ubandhigayaa fidmo, waxaanu kukalifayaa inay ashkatooto xataa, waayo waakaa ninkii kaxarimay baahideeedii iyo wixii ay macaan sanaysay. Ufiirso ashkatada ay arintaa ka ashkatootay Umu Dardaa Allah hakaraali noqdee, markii ninkeedii kagaabiyey xaqii ay kulahayd oo ah inuu u tago waxa arkay Salmaan iyada oo dulaysan oo badalan markaas buu waydiiyey arintaa iyo waxa ay la basaasan tahay, waxayna kujawaabtay Salmaanow, walaalkaa Abu darda waxa Alle wax dan ah oo aduunyo kaleeyahay majirto kadib Salmaan Almuraadi waxa uu fahmay xaqeedii ay kulahayd- inuu kagaabiyey arintaa wuu kala hadlay oo wuu udiiday. Ufiirso ashkatada ay ashkatootay xaaskii Cabdillahi Ibnur Camar saxaabigii waynaa ay ugudbisay odaygii sodogga u

ahaa, kadib markii uu waydiiyey sodogeed xaalka ninkeeda oo ah inankiisa, waxayna tidhi sidatan: (Rag ayuu ufiican yahay laakin furaashna nooma goglo maryahayagana mafitisho) hadalka macanihiisu waxay ujeedaa nooma galmoodo. Ufiirso xaaskani cida ay ashkatadan u gudbinayso waa odaygii sodoga u ahaa ninkeeda dhalay ufiirso sida qisadani ay khatarta u tahay waxay tilmaamaysaa khatarta ay leedahay iyagoo xaaska loo tegiwaayaa mudo dheer.

Muhiimada ay leedahay Nadaafadu Marka lagudagelayo Galmada Waxa aad iyo aad uhaboon sida ay sheegaan culimadu in lagu dadaalo nadaafadda gaar ahaan- cadayashada iyo aad loo nadiifiyo xubnaha taranka, si markaa aan la isu karaahiyeysan.

Cadayashadu waa shayga ugu muhiimsan marka ay isu diyaar garoobayaan lamaanuhu ee howshan ay

utafaxaydanayaan, waa in markaa mid waliba uu sii cadaydo, hadii laakin afka oo badelan oo ur iyo siifad leh laysu soo galo wax badan oo ciyaarihii kamida waxaa laga yaabaa inay hakadaan, suurtagalna manoqonayso in afkii oo kale la iska jaqo, waxa aanay sababaysaa in midkastaaba afkiisa xidho, sidoo kale xubnaha taranka iyaga laftigoodu waa inay noqdaan kuwo loo adeegsado nadaafad badan gaar ahaan xubinka taranka dumarka waxa larabaa inay xaasku nadiifiso islamarkaana ay u isticmaasho xubinkeeda taranka wax udgoon sida uunsiyada,.

Xishoodkii badnaa ee Nebigu SCW umuu diidayn inuu kahadlo arimaha galmada ama laga hadlo

Sida kucad kutubta, Nebigu SCW waxa uu ahaa mid kaxishood badan inanta gashaantida ah, haddana caynkaas oo ay tahay arinkaasi uma uu diidayn inuu kahadlo arimaha galmada, oo laga hadlo, sidii gabadhii saxaabiyadda ahayd ee Rasuulka SCW u timid iyada oo kala hadlaysay ugana ashtakoonaysay

ninkeeda kuna sheegaysay inuu yahay mid xubinkiisa taranku jilicsan yahay sida marada faraqeeda oo kale.

Culimada fiqigu waxa ay kawaramaan hadii lamaanaha midkood uu kuyimaado wax udiidaya inuu showshiisan gudan karo, inay taasi sababayso in lakalafuro oo lasii kala daayo. Tusaale ahaan ninkii oo ay hamadu kaguurtay oo kale, ama qaba xanuunada khatarta ah, sidoo kale gabadha hadii iyana ciladi ay kutimaado sababaysa inuu ninku ugalmoodo waxa ay banaynaysaa shareecada- Islaamku in ninku uu kufuro xaaskiisa sababtaa, sida iyagoo xubinkeeda taranku gees kasoo baxay kaas oo diidaya in loo galmoodo, culimadu muslimiintu aad iyo aad ayay uga hadlaan arimahan caynkan ah ee ishortaagi kara in la isu galmoodo waxaanay kaga hadlaan kutubta fiqiga iyagoo sheega inuu qofku khiyaar leeyahay inuu kalaabto caqdigii iyo meherkii iskugu xidhnaa lamaanihiisa kale, isla halkaana uu kuburburo reerkii

maadaama muhiimadii ugu waynayd ay meesha kabaxday.

Waxtarka Galmada:

Waxa ay yidhahdeen qaar ka mid ah culimadeenii salafka qofku saddex waa inuu joogteeyaa: Waa in aanu ka tagin socodka uu lugeeyo waayo haddii uu u baahdo maalin inuu socdo waa awoodi karayaa.

Waa inuu joogteeyaa cunitaanka uu wax cuno, waayo mindhiciradiisa ayaa cidhiidhi galaya Waa in aanuu ka tagin galmada.

Waxa ka mid waxtarka galmada
Inuu qofku aragiisa laabo oo aanuu dadka eeg eegin

Inuu naftiisaa xaaraan ka ilaaliyo.
Inuu awood u helo dhawrsananta uu xaaraanta ka dhawrsanayo

Waxa ku sugan kitabka " الزهد للإمام أحمد" inuu yidhi imamkasi waa kasamri karaa cunidda iyo cabidda, laakiin dumarka kama samri karo.

Qaar Kamid Ah Qaababka Layskugu Tagi karo

Allaah subxaanahuyee, waxaa uu Quraanka kucadeeyey in dumarka loogu tagikaro sidii uu ninku doono markaa sharcigeenu Islaamku hal meel ah ayuu inaga xaaraatinimeeyey in gabadha looga galmoodo waana xaga danbe,-

Sida aynu dib ka sheegi doono hal waqtina waa xaaraan waana marka ay leedahay dhiiga caadada, wax kale oo naylaga xaaraantimeeyey majiraan. Sidaaa daraadeed, waxaa banana in qaabkasta layskugu tagikaro oo ay doonaan lamaanuhu, xaga hore ayuu uga imankaraa, ama xaga danbe, dhinacdhinac, qadaaqadaad, beerka oo loo jiifiyo, taagni, fadhi, iska soo horjeed iyo qaabkasta oo ay doonaan oo aan ahayn meeshaa Rabbi xaaraan timeeyey ee ah xaga danbe. Culimada muslimiintuna aad ayey ugu xeeldheeraadaan marka ay sharxayaan qaaababka

lays kugu tagikaro, qaarkood aad bay ufarabadiyeen ilaa ay gaarsiiyaan kontan xaaladood.

BAL hadaba qaababkaa qaar kamid ah hadii aynu tilmaano waa sidatan hoos ku xusan, iyada oo ay inagu filnayd aayada quraanka ahayd.

- Xaalada ugu horaysa ee ugu fiican waata ay ku sheegaan culimadu xaaladda caalamiga ah waana midda cid waliba ay taqaano waana isaga oo ninku kasareeya xaaska oo uu kadhigto furaash sidaana uu ugu galmoodo.

- Xaaladda labaad waxay tahay xaaladda ay ku sheegeen ta ugu xun waana taa hore kasoo hor jeedkeeda, waana iyada oo ay gabadhu kasarayso ninka, waxayna sheegaan culimadu in ay dhibaatooyin leedahay xaaladdani oo ay ka mid tahay, adkaanta ay adkaato in ay biyuhu soo baxaan, waxaa kale oo dhicikarta in xubinka taranka ninka biyuhu dib ugu soo dareeraan.

- In ay dhabarka u seexato labada lugoodna mid ay fidiso takalana ay kor utaagto kadibna ninku uu kaga fadhiisto boodyaha- xubinkiisana uu taago sidaana uu ugu galmoodo.

In ay gabadhu useexato wajiga lugahana ay

- fidiso, qaarka danbena ay kor utaagto ninkuna uu dusha kaga seexdo sidaana uu ugu galmoodo.
- In ay qadaadka ujiifsato ninkuna uu jilbaha isku taago labadeeda lugoodna uu garabka saarto sidaana uu ugu galmoodo.
- In ay gabadhu lug kor uqaado midna ay fidiso ninkuna uu kaga fadhiisto jilbaha sidaana uu ugu galmoodo.
- In uu ninku fadhiisto lugahana uu fidiyo xubinkiisana taago gabadhiina ay timaado boodyaha kaga fidhiisato sidaana ay iskugu tagaan.

In ay gabadhu useexato dhinaceeda bidix, lugahana ay fidiso wajigeedana ay u qaloociso xaga danbe, ka dibna uu ninkuna- xaga danbe

- kaga yimaado lugta uu ku marto boodada laabteedana uu ku soo qabto caloosheedan uu ku soo qabto gacantiisa kale.
- Iyada oo gabadhu foorarsato sida ay rukuucsan tahay isaguna xaga danbe uu kaga yimaado sidaana uu ugu galmoodo.
- In uu ninku ku fadhiisto furaashkiisa lugta midigna uu taago, gabadhuna ay soo fadhiisato oo ay taagto lugteeda bidix isna uu kalyaha uu soo qabto sidii uu soo jiidayo.
- In ay ninka iyo gabadhuba istaagaan qoortana is waydaarsadaan sidaana ay iskugu tagaan.
- In ay gabadhu gidaarka qabsato wajigana xagga gidaarka ay ujeedsato qaarka danbana ay muujiso lugahana ay fidiso ninkuna uu xagga danbe kaga yimaado.

Xaaraan Noqoshada In Gabadha Xagga Danbe Looga Galmoodo:

Xaga danbe oo la isaga galmoodo nabi qudha oo ay diintiisa ku bananatay lama sheegin. Axaadiista sheegaysa xaaraantimaynta galmada xaga danbe way badan tahay:

Waxa ku sugan kitabka "سنن أبو داود" xadiis uu wariyay Abuu Hurayra waxa uu yidhi: (Rasuulka Alle SCW waxa uu yidhi “waa la nacdalay – naxariistaa laga dheereeyay- ninka gabadh uga galmooda xaga danbe).

Xadiis kale waxa uu ahaa oo ay wariyeen Axmed Iyo Ibnu Maajah sidatan: (Alle ma eego Nin xaaskiisa uga galmooday xaga danbe. Xadiis uu wariyay Altarmdi Iyo Axmed waxa uu ahaa: (Ninka haweenay xaga danbe uga tagaa ama faaliye ama gabadh caadadii leh waa uu ka gaaloobay wixii Nabi Maxamed SCW lagu soo dajiyay).

Axaadiisatan iyo kuwo kale oo fara badani waxa ay cadaynayaan in ay xaaraan tahay haweenayda oo xagga danbe looga tagaa.

Culimaduna waxa ay sheegaan in ay ku jirto dhibatooyin badan, waxaana ka mid ah dhibatooyinkaas kuwan hoos ku cad: Waxa uu ku keenayaa ninka inuu sameeyo xarakaad aad u fara badan

Waa meeshii qudhunku kasoo baxayay sidaa darted wasakhdaa wax ayaa kasoo gaadhaya. Gabadhana waa mid aad u dhibayaa waayo waa wax dabeeco ahana ka fog oo qofku uu ka cararayo, dumarkuna waa arin aanay ka helin waxa laga yaabaa mararka qaarkood in aad maxkamadaha ku aragto nin iyo gabadh is haya oo gabadhu ay ka cabanayso hawshan isla markaana

ay leedahay waxaan rabaa warqadaydii,-

Markaa hadii aanuu dhib ku keenayn may doonteen warqadeedii

Waxa ay qofka ku keentaa murugo joogto ah, Qofka wajigiisa iyo laabtiisaba waa ay madoobaysaa, waxanay tirtirtaa nuurka qalbiga. Dhibatooyin kale oo aad u fara badana waa ay keentaa.

Xaaraan Noqoshada In Gabadhii oo Dhiigii Leh Loo Tago:

Alle kor ahaaye waxa uu xaaraantimeeyay in iyana loo tago gabadha oo leh dhiiga caadada:

﴿وَيَسْأَلُونَكَ عَنِ الْمَحِيضِ قُلْ هُوَ أَذًى فَاعْتَزِلُوا النِ سَاءَ فِي الْمَحِي ضِ﴾

Alle kor ahaaye aayadan waxa uu leeyahay isaga oo Nabiga SCW la hadlaya, ((Nabiyaw waxa ay ku waydiinayaan dhiiga caadada, waxaad ku tidhahdaa waa dhib ee ka fogaada dumarkiina -ha u galmoonina – marka ay leeyihiin dhiiga caadada illaa ay ka daahir noqonayaan))-

Axaadiista nabiguna sidoo kale waxa ay cadaynaysaa in ay xaaraan tahay.

Xaaraan Noqoshada In Cid Kale Looga Sheekeeyo Galmada Iyo Hadalada Dhex Mara Lamaanaha

Shareecadeena Islaamku waa mid ku dheehan in la ilaaliyo akhlaaqda fiican, waxa aynu ka soo hadalay galmada iyo warkeeda waxa hadaba xaaraan ah, in laga sheekeeyo sida ay wax udhacayaan iyo hadalada lays odhanayo. Nabigu SCW waxa uu ka reebay arinkaa dadka, oo ah in la faafiyo waxa dhex maraaya lamaanaha marka ay ku suganyihiin furaashka iyo qolkooda hurdada. Waxa aan iyana banaanayn in cidkale looga sheekeeyo hadalada dhexmaraya lamaanaha iyo waxa ay samaynaayaan, Haddaba arinkana in aanay u banaanayn waxaa kusoo arooray axaadiista Rasuulkeena SCW wax ka mid ah kuwan hoos ku xusan:-

Nabigu SCW waxa uu yidhi (dadka kuwa usher badan maalinta qimaaha waxa ka mid ah Nin u tagay xaaskiisa iyana ay utagtay (ugalmooday) kadibna midkood uu faafinayo sirtii saaxiibkiisa kale ee lamaanaha ah) waxaa wariyay xadiiskan Muslim, Imaamu Axmed, abu Nucaym iyo waliba Imaamul-bayhaqi.

Waxaa iyana laga wariyay Asma RC in ay rasuulka SCW agtiisa joogtay, rag iyo dumarna ay meesha joogeen, Nabiga ayaa markaa yidhi:-(waxaa laga yaabaa in uu midkiin ka hadlo wixii uu xaaskiisa ku sameeyay, waxaana laga yaaba in ay haweenay ka waranto wixii ay ninkeeda isku faleen, kadib waa ay aamuseen dadkii la fadhiyay rasuulka SCW waxaan markaa idhi (asmaa lehe) : Haa rasuulkii Allow waa ay sameeyaan arintaa dumarku, ragguna waa ay sameeyaan, rasuulkuna SCW waxa uu markaa yidhi: ha samaynina arintaas waa sidii shaydaan la kulmay shaydaamad,

jidna ay ku kulmeen kuna fuulay isla markaana ay dadku eegayaan (fiirinayaan) waxaa wariyay xadiiskan Imaamu Axmed iyo Dabaraani. Imaamu Axmed waxa uu ku soo saaray kitaabkiisa al-musnad xadiis uu wariyay saxaabiga abuu Saciid al-khudri RC oo macnihiisu yahay sidatan: galmada oo laysugu faanaa waa xaaraan iyo in lafaafiyo waxa dhex maraya labada qof. Xadiis kale oo uu abuu saciid mar labaad uu ka wariyay Rasuulka waxa uu ahaa sidatan: (miyaanu midkiin ka baqanayn in xaaskiisa ay isku gaar noqdaan ka dibna uu albaabka usoo xidho, daahana uu siidaayo ka dibna marka uu boxo uu arinkaas uga sheekeeyo asxaabtiisa, miyaanay ka baqanayn haweenayduna inay soo xidho albaabka daahana sii dayso kadibna ay xaajadeeda gudato oo ay arintaas uga sheekayso saaxiibadeed!! Ka dib ayaa ay gabadhii rasuulka SCW ku tidhi:-

Ilaahay ayaan ku dhaartay Rasuulkii Allow waa ay sameeyaan raga iyo dumarkuba arintaas, rasuulku

SCW waxa uu markaa yidhi; ha samaynina arintaas waxa ay la mid tahay shaydaan la kulmay shaydaamad wadada dhexdeeda xaajadiisiina ka gutay ka dibna iskaga tagay, waxaa wariyay albazaar nusuutan iyo axaadiistan marka aynu eegno waxa ah khatar in la fidiyo oo la faafiyo siraha iyaga oo ka sheekaynaya qaabka iyo sida ay galmadu u dhacday iyo hadalada lays yidhi Arintani waa foolxumo wayn waana ceeb aad uwayn oo qof islaam ahna aan u cuntamin, sida ay sameeyaan gaalada caruurteena usoo duuba filimada xun xun ee la yidhahdo sex-ka waxa ay shaashadaha inoo soo dhigaan iyaga oo isu galmoonaya oo ay yihiin qaar qaa-qaawan, oo ay samaynayaan galmadii iyaga oo isku dhagan, sidoo kale hadalana ay dhex marayaan.

Waxa ayaan darro wayn ah in ubadkeena qaar badan oo kamid ah ay ku haystaan moobilada iyada oo la sheego inay isu diraan oo ninba ninkale sii gaadhsiinaayo.dabadeedna qaar badan ay halkaa

kaga xumaato akhlaaqdu. Waxaa daawada hadaba filimada noocaas ah dhalinyaradeena oo dhan ka dib waxaa xaqiiqo ah in hamadoodii iyo shahwadoodii ay kacdo ka dibna waxaa dhacaysa ama ay khatar u yihiin inay ku dhacaan sino. Lama Ogola in aad daawato qofka cawradiida sidoo kale falkan galmada marka ay samaynayaan maaha inaad daawato, labada lamaane ayuun bay u banaantahay in ay is eegi karaan cawradooda lakin cidkale maya.

Haweenayda Oo Ku Ciyaarta Xubinka Taranka Ee Ninkeeda,

Kitaabkeena asraar al-jimaac sifiican ayuu uga hadlayaa masaladan ah in haweenaydu ay ku ciyaari karto xubinka taranka ee ninkeeda, waxaana uu ku tilmaamayaa arin aad u heer sareeya.

Markaa ku ciyaarida xubinka taranku waxay noqonaysaa in inantu ay duugto jacaylkeeda

nolosha ay la wadaagayso, duugduugida ama iyada oo usalaaxda waxa ay keenaysaa in uu xubinkiisii istaago, islamarkaana uu macaansado shareecadeena islaamkuna ma diidayso arrinkaa marka la isu galmoonayo kaliya wuxuun baa xaaraan ah in dabada looga tago haweenayda laakiin qaabkaad doonto aad ugu tagto isla markaana xubinka aad doonto in aad sidaad doonto ugu ciyaari kartaa wax diidayaa ma jiro,- Inagu hadaynu nahay soomaalida wax badan oo ah qaababka ay lamaanuhu isugu raaxaysan karaan waynu ka dhacsanahay mana garanayno Markaa xubinka taranka ninka oo haweenaydu ay ciyaarsiiso waa shay aad u muhiim ah sida uu sheegayo kitaabkeena, sida ninkuba uu ugu ciyaari karo xubinkeeda aynu soo sheegnay, oo wax u diidayaa aanay jirin.

Muhiimadu ay galmadu kulahayd muslimiintiii hore agtooda iyo sida ay uga welweli jireen qaarkood

dumarkooda inay baahidoodan kaqancin kariwaayaan

Maadama ay galmadu tahay xaq kamida ah xuquuqda ugu muhiimsan ee ay lamaanuhu isku leeyihiin, ayaa mararka qaarkood waxa aad arkaysaa culimadii hore iyo salafkii umadda qaar kamida oo uwarwaraya dumarkooda islamarkaana Ilaahay kabaryaya inuu u adkeeyo xubinkooda taranka, arintaasina waa mid cadaynaysa sida ay u- rabeen in ay howshan galmoodka kaqanciyaan xaasaskooda, si wax danbi ah aan loogu raacin Shiikhan waxaa la odhan jirey Maxamed IbnuAlmukandar sida ku cad kutaabka ibnu qayim ee magaciisa la yidhaahdo (rowdatu al-muxibiin). Waxaa uu yidhi mid kale oo ka mid ah culimaddii salafka oo la yidhaahdo sheikh al-layth ibnu sacad hadal uu macnihiisu yahay sidatan: Allahayow ii adkee jirrida xubinkayga taranka, madixiisana ii kor yeel) wuxuuna ujeeda bahal is taaga marka uu hawsha la qabanayo allahayow ii

fududay galida uu galaayo iyo ka bixiduu ka baxaayo xubinka taranka xaaskayga allahawoy igu arsaaq macaansigiisa ina sii ubad fiican oo saalixiina. Sidee Ayaad u Noqon Kartaa Gabadh Ku Guulaysata Hawlaha Galmada:

Waxa ay tidhi haweenay khabiirad iyo xog ogaal ku ah hawlahan isla markaana la hadlaysa dumarka:-

(Waa in aad waydiisaa ninkaaga suaashan: maxaad ka taqaanaa hawshan oo aanan ka aqoon? Sida ciyaaraha dhunkashooyinka iyo wixii la mid ah waxa ay leedahay in aad qaabkan u waydiiso waa dariiqo sahlan oo aad ku heli karto xog fara badan, xagga ninkaaga kaddib waxa ay keenaysaa in uu ninku kaaga waramo waxa uu rabo, iyo waxa uu jecel yahay isla markaa adna waxa aad awoodaysaa in aad ku tiraahdo waxa aad rabto oo dhan

Muhimada Ay Leedahay Isduugida Lamaanuhu:

Waxa aad u muhiim ah in lamaanuhu mar walba ay is xaal ogaadaan, waxa iyana muhiim ah inay isuduugaan jidhkooda, oo mid waliba uu lamaanihiisa kale u duugo isduugidu waa waxyaalaha ugu fiican ee la tajribeeyay taas oo keenaysa inuu jidhku dabco,

Waxaana qofku ku dareemayaa macaansi waxaana uu u diyaar garoobi karaa in uu shaqo cusub qabto, waxaana uuna ka mid yahay ciyaaraha. Muddo hore ayaa la ogaaday muhimadiisa markaa waxa ay bilaabayaan lamaanuhu in midiba mid ka kale uu ka duugo dhabarka, wajiga iyo lugaha waxaana uu siinayaa jidhka debecsanaan. Markaa waxa ay waydiisanaysaa xaasku ninkeeda ee ay nolosha wadaagayaan majeceshahay in aan dhabarka kuu duugo? Ma ku xanuunayaan xubnaha jidhkaagu? Ma daashan tahay oo ma u baahan tahay duugmo? Si

kale waa ay ugu duugi kartaa iyada oo taataabanaysa, ka dibna waxa uu doonayo ayay u xaqiijinaysaa. Duugiduna ninka waxa ay dareensiinaysaa in ay tahay xaaskiisu mid fahmo leh xog ogaalna u ah, isla markaana garanaysa sida ay u duugayso ninkeeda waxaana ay ka biinaysaa caajiska-

Ninku muu ahayn mid kaxishooda inuu kawaramo howlaha kusaabsan xaga galmada hadii dhibi kutimaado isaga oo xal raba

Waa kan shiikhii waynaa ee Cabdullahi Rabiica oo ahaa Imaam wayn oo aad udhowrsoon kana sheekaynaya sababta uu ufuray xaaskiisa islamarkaana raadinaya xal inuu uhelo howshan dhibta uu kacabanayeyna waxay ahayd mid ay dumarku uga carari jireen islamarkana sababtay inuu furo dumar badan waxaanay ahayd dhibtu sidan: (waxa uu ahaa xubinkiisa taranku mid adag, xoog badan islamarkaana aan markaliya seexan oo

taagan mar walba dumarkuna waxay ahaayeen kuwo u samrin siiba dumarka xubinkooda taranku uu yahay mid kooban oo aan waasic ahayn, gabadhuu guursadaa dhowr cisho marka ay lajoogto ayay kacarari jirtay, kadib waxa maqashay gabadh la odhan jiray Saynab Cumar, waxaanay waydiisay dadkii sababta ay dumarku uga- cararayaan ninkan, waxaana loo sheegay inaanayn u adkaysan karayn dumarku, markaasay tidhi muu aniga iguursado, Wallaahay anigu waxaan ahayn gabadh qurux badan qaarka danbena u wayn, xubinkeeda tarankuna uu wayn yahay, waxa u yidhi markaa ninka qisadan warinaayey wuu guursaday waanay kusamirtay, waxaanay udhashay lix caruura, waxaad ka eegtay qisadan kitaabka layidhaahdo Rowdatul-Al-Muxibiin. Gabadha lafteeduna waa mid kudhibaato mudanaysa ninkeeda hadii uu fahmi waayo ninkeedu oo uu kaqancin Kari waayo howshan galmada waana arin loo baahan yahay oo ah xaq la

isku leeyahay inuu lamaanuhu mid waliba midka kale ku raaxaysto.

Qaabka Aad U Duugayso

Waxa aad kari kartaa in aad xaga danbe iska soo taagto marka uu wax akhrisanaayo ama uu fadhiyo computer-kiisa, kuna bilow duugitaankan xagiisa- danbe sida qoortiisa, haddii aad dareento in uu ka helay oo uu macaansanayo waxa uu ubaahan yahay dheeraad, ee waydii markaa meelaha dhibaya ee uu ubaahan yahay, badanaa dadku waxa ay uga baahdaan duugitaanka garabka, qoorta iyo inta sare ee jidhka iyo waliba inta hoose ee dhabarka.

Waxa aad isku daydaa walaashaydaay in aad gacanta ka galiso khamiiska oo aad jidhkiisa ula tagto gacanta oo duugistu aanay noqon maryaha dushooda oo kaliya. Marka aad ogaato in uu udiyaar yahay oo uu ku raaxaysanayo wakhtiguna uu yahay

mid ku munaasab ah, waxa aad ka doontaa in uu khamiiska ama maryaha iska bixiyo.

Gabadha oo lasuneeyaa waa arin diintu ogashahay gabadhana u dan ah xaga galmada iyo xagwalba. In hablaheena aynu sunaynaa waa arin aad iyo aad umihiim ah sharciga Islamkuna uu ogal yahay, - sida daraadeed waa arrin bahalnimo iyo waxshinimo ah, in gabadh yar inta ay isu qabtaan isalaamuhu ay jidhkeeda googooyaan, iyaga oo jaraya xubnihii dareenka usamaynayey inanta, gaar ahaan xubinka dareenka badan ee aynu soo sheegnay, gabadhu dabadeed waxay noqonaysaa mid bilaa hamad ah ama ay yartahay hamadeedu, waana arinta sababta in dumarkeena Soomaalidu qaar badani aanay xiisayn howlahan galmada, oo rag badani ay dhib badan kala kulmaan xaasaskooda marka ay utegayaan. Xaga caafimaad ahaan iyo dahaaradeeda iyo dhinac walba waa arin u

xun gudniinka fircoonigu, laga yaabaa dumar farabadani inaanay xiisayn ama kahelin galmada iyo soo hadal qaadkeeda oo ay kuxisaabtamaan marka ay guursanayaan inay ubad dhalaan oo kaliya.

Sida lasheego inantu marka ay tahay suniyad oo xubnaheedu ubad qabaan, waxay noqonaysaa mid- si fiican ay ninkeeda uwadaagaan howshan galmada, isla markaana helaysa macaansiga uu leeyahy jimaacu (galmadu), hadii kale waxay noqonaysaa mid uu ninku isagu keligii howshan u baahan yahay, lagayaabaa inta uu ninku xaaskiisa u tago xaajadiisana uu kaguto kadibna uu iskaga tago, maradana uu sii saaro sida raashin uu cunay oo uu daboolayo.

Hadaba gabadha dareenkeedii hamadu uu tegay side bay udabiqi kartaa ciyaarihii iyo howlihii faraha badnaa ee aynu soo sheegnay? Suurtogal maaha, taa macnaheedu maaha inaan wada eedaynayo hablaha fircooniga ee iyaga lagu xad gudbay ee way dhacaysaa qaar badani howlahan dabiqi karaan laakin waa dhib badan oo jirta oo laga qayliyo had

iyo jeer dumarka fircooniga ahi, iskumidna maaha marnaba gabadha fircooniga ah iyo tan suniga ahi. Side ayey uga suurtoobi kartaa gabadh uu ninkeedii dhunkan kari waayey inay howlahan badan dabaqdo? Markaa dhakhaatiirtuna waa mid kasheekaysa dhibta uu leeyahay gudniinka fircoonigu, sharciga Islamkuna wuxuu sheegayaa in mag dhamays tirane kawaajibayso gabadha lagooyo labada faruuryood ee xubinkeeda taranka waxaana u waajibaaya 50 halaad ciddii dhibtan geysatay ayaana lagu yeelanayaa, ufiirso dhib intee leg ayaa soo gaadhaysa qofka? Hadii dhibi aanay jirin sharcigu muu xukumeen maqteeda, Allaah isaga ayaa gabadhan xubnaha u sameeyey wuxuna ugu talo galay inay macaansiga howshan ay gaadho, Ilaahay ayaa xigmada og, marka qofka muslimka ah yaan lagu xad gudbin.

Talo usocota waalidiinta hablaha dhalay siiba hooyooyinka Waxaan kula talinayaa waalidiinta gaar ahaan hooyooyin in hablahooda intay Ilaahay kayaabaan ay kadaayaan dhibta, hadii adiga dhibtaa lagugu sameeyey adna inantaada kahudhibin, maadaama xaqii uu kuu caddaaday iminka, iska daa caado iyo dhaqan kasoo jeeda fircoon oo diinta Islaamka u hogaansan, waxa hooyooyinkow aad kusamaysaan hablihiina dhib aad u farabadan danbina waad kugalaysaan xaga diinta Islaamka, xataa uma fiicna salaadda culimadu waxay sheegaan in salaadeedii aanay ansaxayn qofka caynkaas ah ee xidhxidhan ilaama uu xubinkiisa taranka nadiifiyo markaa danbiga halkaa kadhasha qayb ayaad kuleedahay waayo adaa dhibtaa soo gaadhsiiyey inantaada, aabayaashu iyana waa mas'uulka reerka marka iyana waa inay lasocdaan oo islaamaha ay kuwacyi geliyaan sida diinta Islamku qabto.

Canaan adag oo usocota ragga hela gabadh suniyad ah hadana howshaa kufura. Waxa dhacda oo lasheegaa meelaha qaarkood ama aad maqlaysaa siiba dhulka miyiga ah in hablaha lasuneeyey lagu ceebeeyo howsha, sidoo kale waxaad maqlaysa mararka qaarkood in sidaaba lagu furo oo uu ninku yidhaahdo marka uhoraysa ee uu arko gabadhii waa maxay gabadhan furani kadibna uu sidaa kufuro waa ayaandaro wayn, waxay noo sheegeen qaarka mid ah hablaha kasoo baxay jaamacaduhu in meelo wacyi gelin ay kawadeen ay kadhacday in hablihii lagu furay howshaas oo raggii ay guursan waayeen, arintaana ay kudiideen hablihii, markaa waxaan si kulul uleeyahay ragga hablaha suniga ah nasiib uheloow war laylatul khadar ayaad hesheene aamusa oo Ilaahay ugu mahadnaqa.

Dhaqankii hore ee Somalida xagga galmada

Dhaqankeenii hore ee Soomalidu wuxuu ahaa xaga galmada mid kudheehan xishood badan sidaa daraadeed marka howshan laguda galaayo may dhici jirin ciyaaraha iyo waxan kahoreeya dhib wayn ayay lamaanaha qaarkood dhex mari jiray markasta oo ay howshan samaynayaan, dhib badan ayaa ragga qaarkood lakulmi jirtay ciyaaro iyo wax kahoreeyana warkooda dhaaf, ducooyin iyo adkaar la akhristona adaaba sheegaya, dhunkashada ayaan xataa ragga qaarkood usuurtoobi jirin sidii qisadii ninkii aan kusheegay buuggaygii badhaadhaha guurka, ninkan oo in badan kabaryayey gabadhiisa inuu dhunkado iyana ay kulahayd ma kitaab Quraan ah ayaan ahay Quraankaa ladhunkadaaye markii danbe ayay dhabankii kusoo dhawaysay tidhi “hoo oo kugo’”.

Waxa uu sheegay nin ah saaxiibkay in meelaha qaarkood la odhanaayo ninka qaarka danbe ayaad

leedahay ha ii soo dhaafin suurtagal maaha inuu usoo talaabo wixii kasareeya xubinkeeda daranka, sidaa daraadeed ayaa dagaal culusi dhex mari jiray lamaanaha, gaar ahaan habeenka aqalgal kooda, anigaygani nin ayaan maalin lakulmay laabta ay xagtimo kaga yaalaan markaas baan waydiiyey waxaanu iigu jawaabay waa habeenkii aqalgalkayagii dagaalkii nadhex maray xagtimahani, waxaa aan suurtagal ahayn markaa in ciyaaro iyo waji furfurnaan iyo hadalo macaan la isku qaabilo, xaaladu waxay ahayd fiito marka howlahan laqabanayo xataa suurtagal may ahayn in magacyada la isgu yeedho iska dhaaf in hadal naxariis leh la iskugu yeedho, markaa waxaynu rabnaa inaynu kaxorowno dhaqankii qalafsanaa ee ku xeernaa marka lajoogo qolka hurdada,-

Waa in da'yarta isguursanaysa ay kudhaqmaan hab wanaagsan oo ay dabaqaan intii suurtagal ah markaa wiil iyo gabadhkastaba waxaan Ilaahay

kabaryayaa inuu ku anfaco Kitaabkeena, sidoo kalena Rabbi Waxaan ka baryayaa inaanu kayeelin buugeenan cilmiga xaqa ah ee kuduugan mid loo adeegsado xagga xun ee xaaraanta.

FAAH-FAAHINTA MAS'ALADA AH IN LAMAANUHU XUBNAHOODA TARANKA AFKA GALINKARAAN IYO KHILAFKA CULIMADU AY ISKU KHILAAFEEN MAS ALADAN

Diinta islaamku wax-walba waa mid cadaysay, culimada islaamkuna waa kuwo arinkasta falanqeeyay, oo u bandhigay kitaabka qur'aanka ah iyo sunnaha rasuulka (scw) hadaba mas'aladeenan hadii aynu u soonoqono waa sidan:

Culimada musli miintu mas'aladan waa kuwo ka hadlay Kun kala aragti duwan qaar kood waa ay baneeyeen waana madhabka xanaabilada iyo maalikiyada qaarkood sida uu sheegay sheekha magaciisu yahay AL ASBAQ.

Culimada qaarkoodna waa kuwo diiday kuna sheegay karaahiyo ama xaaraan. Hadaba qolooyinka baneeyay lamaanuhu in ay xubinkooda taranka afkalagalikaraan islamarkaana ay ku raaxaysan karaan waxa ay daliil arinkaa uga dhigeen, in shareecada islaamku ay anaysay in lamanuhu ay is kugu raaxaysan karaan qaabkii ay doonaan, iskugu raaxaysankaraan meesha ay doonaan waxaanay leeyihiin sharciga islaamku waxuunbuu diiday in uu ninku xaaskiisa xaga dambe uga tago waayo xaga dambe waa meeshii saxaradu kasoo baxdo ilaahayna uguma talagalin in looga tago,

Sidookale shar ciga islaamku waxa uu diiday iyana in xaaska loot ago marka ay leedahay dhiiga caadada amma dhiiga dhalmada, aayad qur'ana ayaan lagu sheegay oo macneheedu yahay sidatan hoos ku xusan:

"Dumarka ka dheeraada marka ay caadada leeyihiin hana u dhawaanina inta ay ka daahiroobayaan,

marka ay daahir noqdaan uga taga halka rabbi idin faray oo xaga hore ah. Marka Aayadda waxa ay kadaliishadeen inaan la diidin waxkale oo dhan. Waxa kale oo ay daliishadeen culimada hawshan banyanaysa xadiiskii rasuulka (scw) kaa soo macnihiisu yahay sidan soo-socota: Macnaha xadiiskani waxa uu yahay sameeya waxwalba oo isku raaxaysiya marka ay dumarku caadada leeyihin u galmoodka mooyaane , markaa waxa ay leeyinhiin maadaama aanuu rasuulku waxkale diidin galmada mooyaane arinkana waa arin iska banana waxa ay markaa kaga- jawaabayaan xadiiska rasuulka(scw) ee ay warisay caa'isha in uu yahay xadiis daciifa, xadiiska oo macnihiisu ahaa sida tan: maan arag cawrada rasuulka isna ma'arag wayna leeyihiin qoladani axaadiista saxiixa ahi waxa ay sheegaysaa in uu rasuulku (scw) lamaydhan jiray xaasaskiisa waxaanay ku tu saysaa axaadiistaasi in ay banana tahay in lamaanuhu cawrada iska eegi karaan .

Qolooyinka kale ee ka soo horjeeda ee iyana diidan arinka waxa ay daliishanayaan xadiiska sheegaya in lamaanuhu aanay iska ee gi Karin xubnaha taranka, xadiiskan oo ahaa kii ay warisay caa'isha oo ma cnihiisu ahaa (maan arag xubinka tranka rasuulka) waxa wariyay ibnu maaja iyo imaamu axmed.sheekh albaani waa uu daciifinayaa xadiiska qoladii hawshan ogo laydna way dacii finaysa. Markaa waxay leeyihiin hadii xubinka taranka oo la'iska eego ladiiday ma'aha mid banana in afk lala galo.

ARAGTIDA QORAAGA

Markii aan eegay hadalada culimada iyo hadale kale oo badan oo aynaan halkan ku sheegin waxa aan ayidayaa Sida culimadan dambe ay ayideen oo ah in aanay banaanayn sababaha Kan awgood: Carabku waa xubinka ilaahay lagu xuso waxa banana in aan la galin meelaha aykasoo baxaan madida, wadida, iyo kaadida, oo dhamaan toodba ah nijaas waxalayna faray in aynu kadheeraano nijaasta, waxana adag

sida looga baxsankaro nijaasta loo yaqaano madida oo soo baxda xiliyada laysku tagayo iyada oo ah nijaastani biyo cad oo jilicsan oo soo baxaya marka ninka iyo gabadhiisu ciyaarayaan waana nijaas ay adagtahay sida layskaga ilaaliyo.

Waxa dhicikarta in xubinku uu leeyahay ur ama siifad ama ay wax ku dhagan yihiin kadibna uu qofku afka lagalo oo cudur ay ku noqoto, hadii aanay ku noqonna waxa dhacaysa karaahiyo amma lamaanihiisii kale oo u arka mid aan nadaafad- lahayn waxa dhici karta hadii uu qofku halkaa ka barto in uu dayaco qaab kii kale galmada iyo meeshii ay ahayd in layskaga galmoodo waxyaale kale ayaa dhici karta oo ay ka mid tahay in uu ninku gabadha ku qasbo in ay xubinkiisa jaqdo kadibna ay diido oo ay ka xishooto, islamarkaana sidaa ku bur-buro waxaan macnelahayn sida sheeko bari laysheegay oo ahayd nin ayaa gabadh guursaday kadib waxa uu ka doonay In uu xaga dambe uga tago iyana way diiday jiq ayaa laysla

noqday aakhirkii reerkii sidaas ayuu ku bur-buray , hawshan oo kalena wuu ka iman karaa bur-burka reerku waliba inagu hadii aynu nahay soomaali hawlahan galmada ku wareegsan oo dhami waa xasaasi, culimada waawayn ee muslimiintana aad ayaa loo waydiiyaa hawsha galmada gaar ahaan mas'aladan ayaa lawaydiiyaa mrkaa qaarkoodna mabaneeyan qaarna way baneeyaan.

GABA-GABADA MAS'ALADAN

Mas'aladan warkeeda intaa ayaynu ku dhaafaynaa Laakiin anigu waxa aan is waydiiyaa maxay tahay raaxaysiga kujira xubinka oo afka lagaliyo sababahan aan sheegayna ee aan ku diidanahayna waa mid ay sheegaan culimo badan , qaarkood waxa ay sheegaan xataa in ay keeni karto kansar sidaa daraadeed waxaan ku talin lahaa in lagafogaado hawshan waxaana jira siyaabo farabadan oo lamaanuhu iskugu raaxaysan karaan kitaabka xagiisa hore kuwaasoo ahaa bilaa khilaaf markaa adiga oo

helaaya wax bilaa khilaafa maxaad ku falaysaa wax khilaaf ku jiro dhibina kaaga imankarto.

ARAGTIDA QORAAGA EE KU WAAJAHAN IN SU'AALAHA JINSIGA AH LA WAYDIIN KARO CULIMADA

Diinteenu waa shareeco dhamaystiran wax walbana way caddaysay , wax allaale wixii ku- saabsan aakhiro iyo adduunba way balballaadhisay , qaab nololeedka ummaddana waa mid qeexday, marka ay wax gadanayaan(iibsanayaan) qaabka iyo sida ay wax u iibsanayaan , wixii iibsigaa bannaan iyo wixii aan bannaanayn , haddii ay is guursanayaan qaabka ay isku guursanayaan , sida diinteenu ay ogoshahay ee ilaahay banneeyay iyo wixii ay diiday , macaamalaad kasta oo la qabanayo , waa mid ilaahay iyo rasuulkiisu ay innoo caddeeyeen , culimada muslimiintu waxa ay hayyaan dhaxalkii ambiyada , ambiyadana diin ayaa laga dhaxlay , sidaa daraaddeed qofka muslimka ah ee aan aqoon

u lahayn diinta , wixii uu ka jaahil yahay waa in uu waydiiyo culimada , waayo ilaahay ayaa quraanka innagu faray in dadka cilmiga leh la waydiiyo , markaa innagu haddii aynu nahay soomaali su'aalaha jinsiga ama hawlahan galmada ku saabsan waxaynu ka aaminsannahay in la is waydiiyaa in ay khalad- tahay , xattaa culimada soomaalida in badan oo ka mid ah waxay u arkaan su'aalahaas oo la is waydiiyaa in ay khalad tahay, laakiin waxaad arkaysaa culimada kale ee muslimiinta ah oo intaa la waydiinayo kana jawaabaya , iyaga oo aan dhibsanayn , laakiin innagu waxa aynu ka dhignay wax aan la soo hadal qaadi Karin , taana waxaan u arkaa arrin khalad ah.

Su'aalahan jinsiga ah haddii ay dhalinyartu u baahdaan qaarkood diintu waxay ka qabto , islamarkaana ay culimadii ay waydiiyaan , culimadiina ay ka jawaabi waydo , jawaabta waxay waydiinayaan meel aan munaasib ahayn, markaa anigu waxaan u

arkaa inaanay khalad ahayn in looga jawaabo , maadaama culimadii hore ee muslimiintuba ay ku caddeeyeen kutubta , oo wax kasta oo ku saabsan jinsiga waxaad arkaysaa iyaka oo kutubta ku faahfaahiyay, markaa haddii ay khalad tahay in hawlahan la is waydiiyaa- culimadeennii hore iyo kuwii dambe ee muslimiintuba way ka aamusi lahaayeen , waxaanay odhan lahaayeen yaan la is waydiin.

Ra'yiga odhanaya xayawaanaadkuba way yaqaannaan sida la iskugu tago waa sax laakiin Waxa laga yaabaa dadka qaarkood xattaa culimadeenna soomaalida inay yidhaahdaan xayawaanaadkuba way yaqaanaan sida la iskugu tago ee maxaa laga sheegsheegayaa iyaga oo hadalkaa aad mooddo inay uga jeedaan dee innaguna caqli ayaabaynu leennahay , ninkastaana wuu yaqaannaa sida uu xaaskiisa ugu tagayo , ee

maxaa la iska waydiinaya , waxa aan leeyahay waa sax laakiin innaga iyo xayawaanku waxbaynu ku kala duwannahay , xayawaanaadku iyagu maaha kuwo mukallaf ah , waajibaad ayuu ilaahay inna saaray , iyaga laakiin waxba ma saarna , innaga se hawshu maaha xubinka xubinka gali oo kali ah ee- wax badan oo la innoo jideeyay ayaa jira , waxyaabo galmada ka horreeya oo aadaab ah ayaa jira , waxyaabo la innoo diiday ayaa jira oo mamnuuc ah, oo ay ka mid tahay in xagga dambe la iskaga tago , markaa waxyaalo badan oo ku hareeraysan hawshan ayaa jira, mana aha markaa in la yidhaahdo sida xayawaanka ha loo dhaqmo.

Aadaabta ku saabsan habeenka aqal-galka lammaanaha

Innaga oo soo sheegnay waxyaabo loo baahanyhay oo aadaabiyaad ah oo ku saabsan hawshan, waxa aynu halkan ku xusaynaa iyada oo qodobaysan waana sida tan hoos ku cad:-

- In la is udgiyo marka hawshan (galmada) la qabanayo oo wax udgoon la is mariyo inta aan la isu tagin, waayo waxa ku sugan labada kitaab ee bukhaari iyo muslim, inay tidhi caa'isha (R.C) oo ahayd xaaskii-rasuulka (S.C.W) waxa aan u marin rasuulka wax udgoon, markaas ayuu xaasaskiisa ku wareegi jiray (macnaha wuu ugalmoon jiray) ka dib ayuu xarman jiray oo xaramka tagi jiray, markaas ayuu waabariisan jiray isaga oo uduggii ka urayo.

- Waxa sunne ah inuu ninku akhriyo habeenkaa iyo markasta oo uu hawshan qabanayo ducadii uu rasuulku inna baray ee aynu soo sheegnay.

Waa inuu sameeyaa ciyaaraha ka horreeya

- galmada ee aynu soo caddaynay ,hana iska jiro ninku inuu u tago xaaskiisa isaga oo aan ka horraysiin ciyaaraha , waana khalad iyada oo

ciyaaro aan laga horraysiin in la isku tago, waayo nabigu (S.C.W) waxa uu ku yidhi saxaabigii jaabir hadal uu macnihiisu yahay sida tan:-

"Maxaad u guursan wayday gabadh kula ciyaarta adna aad la ciyaarto, oo aad ka qosliso iyana kaa qoslisa" waxaa wariyay xadiiskan bukhaari.

- Qaababka la isugu tagi karo oo dhan oo qaarkoodna aynu soo sheegnay hal meel ah ayuunbaa loo socdaa oo looga galmoon karaa waan xagga hore.
- Ninku marka uu xaajadiisa dhammaysto, xubinkiisa taranka yaanu ka siibin xubinkii kale ilamaa iyana ay xaajadeeda dhammaysanayso, markaa xattaa biyuhu marka ay ka yimaadaan waa inuu sugaa illamaa uu u arko in iyana ay hawsheedii ay u dhamaatay.

- Waxa xaaraan ah oo aan bannaanayn inuu u tago xaaskiisa oo caadadii leh , waayo rasuulku waxa uu ku yidhi- xadiiska uu wariyay abuu daa'uud hadal uu macnihiisu sidan yahay:- "Ninkii u taga gabadh dhiigga caadada leh, ama se xaga dambe uga taga, amma faaliye u taga waa uu ka gaaloobay wixii nabi muxammad lagu soo dajiyay".
- Waxa xaaraan ah in xagga dambe looga galmoodo xaaska, haddii uu ninku ka codsadana waxa ku waajib ah xaaskiisa inay diiddo waayo wixii macsiyo ah ee ay diintu reebtay makhluuqqa lagu addeeci maayo.
- Waxa xaaraan ah in la faafiyo hadallada sirta ah ee dhexmara lammaanaha marka ay hawshan galmada ku guda jiraan,
- arrinkaana waxaa u daliil ah hadalkii rasuulka (S.C.W) ee macnihiisu ahaa sida tan hoos ku cad:-

“Dadka waxaa u shar badan ilaahay agtiisa Nin xaaskiisa u tagaya iyana ay u tagayso ka dibna sirteedii uu faafinayo” xadiiskan waxaa wariyay Muslim, saxaabiga wariyayna waa abuu saciid al-khudri.

su:aalo iyo jawaabo ku saabsan jimaaca(galmada)

Marka hore sida aynu ka arkayno kitaabkeenan yar, sida aad arkayso waxa uu xanbaarsanyahay cilmiyadan waafaqsan shareecada islaamaka, isla markaana ku saabsan galmada iyo waxyaalaha ka horeeya. marka waxa aan raba aniga oo ah qoraaga kitaabkeenan in aan halkan isku waydiiyo su’aalo isla markaana aan jwaabahana raaciyo,si aynu uga faaiidaysano ,aniga oo iska soo qaadaaya in uu su’ aalaha iweydiinaayo qof kale, su’aalahan qaarkoodna waakuwo si toos ah loo waydiinayao culumada qaarkood,gaar ahaan culumada waawayn ee qarnigii dhamaaday,sida-sh.albaani,sh.ibnu cusaymiin,iyo kuwo kale ,laakiin

isku wadadaroo cilmiyadan uu buugu xanbaarsanyahay hore iyo dibba waa kuwo daliilo wata,ama qur aan,ama xadiis nabi,ama hadalada culumadii hore ee muslimiinta ee maaha wax aan anigu iska leeyahay ,hadaad kutubta eegtana ama internetka waa ay ku jiraan ,ciloo la waydiinayo culumdana aan sheegayo iyo kuwo kaleba, haddaba sidatan hoos ku cad ayay udhacayaan ka faa iideysi wacan :

s.1: maxaa kugu ka lifay inaad mawduucan xasaasiga ah ee aanay ka hadli jirin culumadeenii hore ee soomaalidu inaad ka hadasho ?

j. waxaa igu kalifay marka hore waxaa jirta in reeruhu burburka ay burburayaan uu ka mid yahay waxa sababay arimaha guriga jiifka oo aan hagaagsanayn isla markaana aan waafaqsanayn shareecada islaamka, iyaga oo aanay lamaanuhu udhaqmayn gaar ahaan marka ay hawlahan ay-qabsanayaan qaab sax ah, iyaga oo markaa ku

gudanaya qaab niyad xumi ah markasta oo ay hawlahan qabanayaan, taasina ay sababtay in reeruhu ay sidaa ku burburaan, oo waxaa waliba dhacda dumarka oo aad u xishood badan in aanay hawshan si fiican u gudan iyadii oo aan ninkeediina waydiin karayn, hawshan inuu uguto si iyada iyo isaguba ayraali ku yihiin, ka hadalka aan ka hadlo waxaa igu kaligay oo ugu wayn sababkaa, waxa aan aaminsanahay haddii hawlahan loo guto sida sharcigu ogolyahay culumaduna ay ku sheegaan kutubtooda,in burburka reeraha waxbadani ay isbadali lahaayeen, takale culumadeenii hore ee soomaalidu noocay yihiinba hanoqdaan kuwii hore ama kuwan danbe, hawshan may ka hadli jirin waana hawl ay ka gaabiyeen, laakiin culumadii hore ee muslimiintu marka aad kutubtooda eegto waxa ay ahaayeen kuwo hawshan balbaladhiya oo si fiican u qeexa,- xataa kutub gaar ah ayay qaarkood kaga hadleen, gaar ahaan culumadan danbe ee ah

macaasirka. s.2: miyaan la odhan Karin hawshani waa shay fidriya (ku abuuran qofka) oo ay garan karaan xataa xayawaanaadku sidii ay ugudan lahaayeen, markaa maxaa looga hadlayaa?

j. waa sax oo ilaahay ayaa ku abuuray noolaha oo dhan, oo xataa xooluhu way yaqaanaan, kaaliin inaga waxaa jira oo layna faray in aynaan sida xayawaanaadka u gudan, oo aan laysku soo boodin sida dameerku uu dameerta ugu boodo, markaa haddii la rabo in lamaanuhu ay isku raaxaystaan, ka fursan mayso in cilmiyada badan ee culumadu inoo sheegeen laga faaidaysto.

3. Nadaafada lamaanuhu is nadiifiyaan ee ay is udgiyaan saamayn ma ku leedahay gudashada hawshan galmada?

J. haa, mid weyn, oo haddii ay yihiin kuwo aan nadiif ahayn waxbadan oo macaankii hawshan ah- ayaa ka dhiman, markaa in jidhka la nadiifiyo la maydho (qubeysto) waa shay muhiim u ah hawshan, cadarro,

iyo wax udgoon oo laysmariyaa iyana waa muhiim waana shay daruuri ah.

4. Xubinka taranka gabadha oo wax udgoon la mariyaa saamayn intee leeg ayay ku leedahay hawshan?

J.mid weyn waayo xataa gabadha marka ay caadada ka maydhanayso shareecada islaamku waxa ay faraysaa in ay khirqad (maro udug leh) la marmariyo meesha (xubinka taranka) rasuulka ayaana sidaa faray.

5. Afka oo aan nadiif ahayni dhib ma ku keenayaa hawshan galmada?

j. haa oo xataa nabigu marka uu yimaado gurigiisa waxa uu ku bilaabi jiray wax uu qabto in uu cadaydo, markaa qayb libaax ayuu ka qaadanayaa afka oo la nadiifiyaa hawshan, waayo dhunkashada iyo carabka oo layska muudmuudsadaa suurtoobi- mayso haddii uu afku yahay mid ur leh, markaa aad iyo aad waa in loogu dadaalaa xataa saacadaha danbe ee habeenkii

marka ay lamaanuhu hurdada ka soo toosaan u suurtoobi mayso in ay afka iska ur ursadaan ama ay carabka isticmaalaan waayo afkii ayaa is badaley.

6. Hadalada lays waydaarsanayaa inta hawshan lagu guda jiro wax ma ka tarayaan?

j. haa mid weyn oo waxa larabaa hadalo dabdabacsan in ay isticmaalaan oo hawshan ku shaqo leh , sidaas daraadeed ma fiicna in la kala aamuso oo gabadhu waa inay ninkeeda hadalo jiljilicsan oo aan qallafsanayn kula hadasho ninkuna sidoo kale , haddiise la kala aamuso wax badan ayaa ka dhiman isku raaxaysigii lamaanaha. 7. Labada qof oo isu taga iyaga oo kala cadhaysan ama midkood cadhaysan yahay wax maw dhimi kartaa hawshan?

J.haa haba yaraatee wax macaan ah oo ay ka helayaan ma jiro.

8. Ka waran ninka oo ku booda lamaanihiisa iyada oo aan ka war hayn ama ay iska huruddo?

J.maaha arrin fiican raaxaysiguna maaha mid dhamaystiran ama isu dheeli Tiran, waayo waxa aynu aad uga soo hadalnay ciyaaro badan oo ka horeeya haddii markaa ciyaarihii meesha ka baxaan wax badan ayaa maqan.

9. Hawshani galmadu ma tahay mid xishood looga baahan yahay, oo labada lamaane midkood qaabka uu rabo in lamaanihiisu hawsha ula gutto ma ka xishoon karaa mise wuu weydiisan karaa?

J. maya wixii xun ayaa laga xishoodaa laakiin lamaanuhu, lamaanihiisa kale hawshan waa inay is weydiiyaan.

10. Ma dhacdaa lamaane habeenkii isugu horeysey isu sharxay wixii ay rabeen si ay ugu wada noolaadaan nolol aad u macaan?

J. haa way dhacdaa tusaale ahaan sheekhii weynaa ee ahaa qaadiga muslimiinta , ee la odhan jirey qaadi shureyx ayaa waxa uu guursaday gabadh , habeenkii aqal galkoodqa markii uu u baahday , ayay ku tidhi joog , dabadeed khudbad ayay u bilawday,

waxayna ku tidhi ii caddee waxaad rabto , si aan u sameeyo , waxa aad hadana necebtahay si aan uga fogaado, waxa uu yidhi wallaahi waxa ay igu kaliftey khudbad dabadeed waan u sharxay waxaan rabey iyo waxaanan rabin, dabadeed waxa uu yidhi labaatan sano ayaanu is qabney nolol heer sare ah ayuu sheegay in ay ku wada noolaayeen , oo aanay marnaba is khilaafin .

11. Habeenka u horaysa ee aqal galka lamaanaha ma iman kartaa khajilaad iyo fashil?

J. haa way dhacdaa waanay ka sheekeeyaan culumadu , waxaa jirey wiil iyo gabadh is guursaday , dabadeed habeenkii aqal galkooda ayaa mi waliba maryhiisii dhigtay (la baxay) muddo- saacad gaadhaysa ayuu midiba midka kale eegaayay , dabadeed ninkii ayaa ku yidhi gabadhii naa hooyadaa miyaanay wax kuu soo sheegin , iyana waxay ku tidhi waar mayaanuu aabahaa wax kuu soo sheegin , markaa mid waliba maya ayuu ku

jawaabay , ka dibna mid waliba dharkiisii ayuu dib u xidhay , labadii habeen eek u xigteyna sidii oo kale ayaa ku dhacday markaa way dhacaan hawlahani oo kale , laakiin waxa larabaa mar walba inuu ninku khajilaada ka bi iyo inanta .

12. Gabadhu marka ay ubaahato nikeeda isaga oo aan u diyaar ahayn afkana ay kala xishoonayso maxay samaynaysaa?

J.waxa ay samaynaysaa in ay duug duugto oo ay taa taabato gaar ahaan xubnaha dareenka badan 13. Khasabka uu ninku xaaskiisa hawshan ku khasbaa waa arrin caynkee ah?

J. ma fiicna, qofka oo aad soo jeediso oo dareenkiisu kacsanyahay ayay hawshani ku macaantahay.

14. Muxuu samaynayaa ninku haddii lagu koco oo uu u baahdo xaaskiisa iyaduse ay leedahay dhiigii caadada?

J. maya uma tagi karro laakiin si kale ayuu u raaxaysan karaa, sida isagoo dhunkada ama

jidhkeeda taa taabta iyo wixii la mid ah laakiin marnaba uma banana in uu u galmoodo. 15. Ninku xaaskiisa naaska ma ka jiqi karaa? J. haa wax diidayaa ma jiro waanuu ka mud muudsan karaa.

16. Raaxaysiga ay lamaanuhu isku raaxaysanayaan noocuu yahayba oo shareecadu ay diidaysaa ma jiraa?

J. maya waxaan ka ahayn in uu xaaskiisa xagga danbe uga tago iyo in uu u tago iyada oo leh dhiigii caadada.

17. Ninku ma ku ciyaari karaa xubinka taranka ee xaaskiisa?

J.wax diidayaa ma jiraan waliba xubinkeeda aadka u dareenka badan ee xasaasiga ah way fiicantahay in uu ku ciyaaro.

18. Gabadha (inanta) oo loo gudo qaabka gudniinka fircawniga dhib ma ku leeyahay hawshan galmoodka?

J.haa wuu ku leeyahay waxaa jirta in dumar badan xubinkoodii la googooyay, oo hamadeedii ay guurtay

ama ay yaraatay, sdaa daraadeed ayaa sharcigu uu ciqaab saarayaa ciddii gabadhan googoysa xubinkeede waxaana u waajibaaya gabadhan magteedi oo dhan, sababta oo ah waxaa tagay macansigii ay macaansanaysay hawsha galmoodka.

19. Muxuu samaynayaa ninka hamadu ay ka yaraato oo xaaskiisa qancin Kari waaya?

J. wuxuu la xidhiidhayaa qolooyinka cilaajka ee quraanka iyo dhirta wax ku dhaweysa / ama waxa uu la xidhiidhayaa dhakhaatiirta.

20. Gabadhu haddii ay qawado ninkeeda maxay samaynaysaa?

J. ha u sheegto ninkeeda oo ha ugu nasteexayso in uu is daweeyo.

21. Gabadhu maxay samayn kartaa haddii ninka ay hamadu ka tagto isna uu diido in uu furo?

J. waxa ay la xidhiidhi kartaa maxkamada haddii ay waxba xalin Kari waayaan isna ay sidaa kaga tagto

22. Ciyaaraha ka horeeya isu galmoodka Malaga tagi karaa?

J. maya maya wax badan oo macna ah samayn mayo haddii ciyaaraha ka horeeya galmoodka laga tago.

23. Ciyaaraha maxaa ugu muhiimsan la rabo in la badiyo?

J. waxa ugu badan dhunkashada waxaa la rabaa in lamaanuhu ay badiyaan, nabiguna (scw) waxa uu ahaa mid xaasaskiisa dhunkada.

24. Cawrada malayska eegi karaa?

J. haa, qolooyinka diida waxbadan oo xujo ah ma hayaan sidaan ku balbalaadhiyay buugeenii badhaadhaha guurka.

s25. Gabadha suniyada ah iyo ta fircowniga ah miyay ku kala fiican yihiin hawshan galmoodka? J. haa isuma dhawa waayo midna waa lagu ciyaaray xubinkedii taranka oo waa la googooyay midna way caafimaad qabtaa waxana la gudboon ninka guursada gabadh suniyad ah in uu hawsha iyo xaqeeda iska ilaaliyo.

26. maxay tahay aadaabta loo baahan yahay xaalada galmoodka , xuduuda aan ladhaafi Karayn maxaytahay , maxaa se kaxaaraana ah ,xaalada ugu fiican ee isku galmoodku waamaxay ?

j. Aadaabta loobaahan yahay waa in la akhristo ducadii rasuulku Ina baray (scw) ee ahayd: bisinka ALLE ayaan ku bilaabanayaa hawshan, Allahayaw- naga dheeree shayndaanka, kana dheeree wixii aad nagu arsaaqi ee ubad ah. Hadii markaa lasiiyo ubad Madhibo shaydaanku. Waxa ay xaaaraantahay in laysku galmoodo marka ay xaasku leedahayh dhiigii caadada, waxa iyana xaaraana in looga galmoodo xaga dambe, waxa ay tahay xaalada ugu fiican ee layskugu - galmoodo in uu ninku ka sareeyo haweenaydiisa iyana ka hoosayso. Ducada lagu ducaysanayo marka laysu tagayo maraga ayuunbaa ku ducaysanaya mise dumarkuna way ku ducaysanayaan?

J. ducadan waxa loo jideeyay ragga waayo rasuulka waxa kamid ahaa hadal kiisa sida tan: “hadii midkiin

marka uu xaaskiisa u tagayo yidhaahdo ducada ’’ markaa hadalkan rasuulka (scw) waxa ku cad in hadalku u socdo ragga, hadii ay duamrkuna ay ku ducaystaan dhib malaha

28. Lamaanah a ma u banaantahay in midbamidka kale jidhkiisa oo dhan uu eegi karo,

J. haa, ninku meelkasta xaaskiisa wuu ka eegi karaa, xaaskuna sidoo kale meelkasta way ka eegi kartaa

29. Ninku gacanta xaaskiisa ma iskaga keeni karaa biyaha shahwada?

J. haa wuu iska keeni karaa.

30. Ninku marka uu rabo xaaskiisa in uu ku laabto markale muxuu samaynayaa.

J. wuu waysay sanayaa waayo rasuulka (scw) ayaa yidhi midkiin hadii uu rabo in uu kulaabto xaaskiisa ha wayso qaato.

31. Lamaanuhu iyagoo kalamaqan telephone ka makaga wada sheekaysan karaan galmada, iyada oo xataa midkood amma labadoodiiba ay

sidaa biyuhu kaga yimaadaan? J. haa way banaantahay dhibmalaha.

32. Oo xataa qacan tiisa miyuu isticmaali karaa oo biyihii sidaa ma iskaga keeni karaa.

J. hadal ayaa ku jira arintan mana banana isaga oo naftiisa zina iyo xumaan ugu baqda mooyee.

33. Xasku xaq ma u leedahay hadii uu ninkeedu doono in uu u tago in ay diido iyadoo leh waxaan tukanayaa salaatu layl caawa oo dhan?

J. maya kaasi cudurdaar manoqonaayo, waayo xaqa ninku waa-waajib slaadanina waa sunne, waa jibka ayaan laga horaysiinayaa sunnaha, rasuulkuna (scw) waxa uu ku sheegay xadiiska ay soo-saareen bukhaari iyo muslim sida tan hoos ku cad: “hadii uu ninku xaaskiisa ugu yeedho furaashka oo ay diido oo sidaa waago ku baryo isaga oo u cadhaysan, malaa igta ayaa nacdalaysa illaa uu waa gu ka baryaayo.

34. Waamaxay xukunka ninka oo xaaskiisa uga galmoodo xagga dambe?

J. waa kaxaaraan arinkaasi ninka waxa u bannan xaga hore (xubinkeeda taranka) dhinaca uu doonaba hakaga yimaadee.

35. Muxuu samaynayaa ninku hadii xaaskiisa aanuu u galmoon Karin oo ay xaaraan katahay sida iyada oo leh dhiigii caadada, islamarkaana aanuu samrikarin.

J. wuxa uu kaga raaxaysankaraa jidhkeeda oodhan marka laga reebo xubinka taranka iyo xaggadambe waxaana fiican markaa in aad soonto si shahwadaadu u jabto

36. Xaaskayga ma u tagi karaa habeenkii hal mar in kabadan aniga oo aan u dhaxaysiinayn madhasho?

J. haa laakiin waxa khayrbadan in aad wayso qaadato in taanad ku laaban.

37. Goorma ayaanan xaaskayga u tagi Karin marka ay uurka leedahay?

J. dhib malaha xaaskaaga oo uurleh in aad utagto marwalba hadii aanay arintaasi dhib ku keenayn

wuxuunbaa laguu diiday in aad u tagto iyada oo leh dhiigii caadada taasina waa xaaraan, waayo- ALLAAH waxa uu yidhi hadal macnihiisu yahay :'' kadheeraada hana u tagina dumarka xaalad ay caadada leeyihiin hana u dhawaanina inta ay dahaaro qaadanayaan ,

Marka ay daahir noqdaan u ga ta halkii rabi idin faray waa xagga hore e ,waxa iyana aan lootagi Karin marka ay dhasho ee ay leedahay dhiiga dhalmada ,sidoo kale looma tagi karo marka ay acmaasha xajka iyo cumrada ay gudanayso .

38. Ninka ma u banaantahay in uu dharkiisa dhigto dhammaan iyana uu kabixiyo? J. haa way u banaantahay.

39. Maxaa looga jeedaa marka rabbi uu leeyahay dumarkiinu hu' amma dhar ayay idiin yihiin idinkunna aad u tihiin?

J.waxa looga jeedaa waa kuwo aad ku xasi shaan, iyaguna indinku xasila waxaana sidaa ku fasilay (

ibnu cabbaas,mujaahid,saciid ibnu musayb, xassan al basri , suddi iyo muqaatil) waxa uu ku fasilay- rabii ibnu Anas dumarku waxa ay idiin yihiin furaash idinkuna aad u tihiin , waxa kale oo uu yidhi sheekha ibnu kasiir , midkasta oo kamid ah lamaanaha mid waliba midka kale ayuu ku dhex galayaa oo lajiifsanayaa ?

40. Lamaanuhu sawir ma iska qaadi karaan marka ay isku tagayaan? J. maya, maya.

41. Ninka dhalin yarta ahi isga oo aan xaas lahayn maku fikiri karaa galmada isaga oo khayaaliyaad is hor dhigaya? J. maya.

42. Ninku isaga oo aan is ogayn in xaaskiisu ay caado leedahay haduu u galmoodo maxay noqonaysaa?

J. ku dambaabi mayo hadaanuu ogayn.